

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 9aad

FAAFIN SANADLE

Muqdisho

2022

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2022

Qiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADKA

2022

SHARCI LR. 50 ANSIXINTA MIISAANIYADDA SEDDEX BILOODLAHA 1 ^{da} ABRIL ILAA 30 ^{ka} JUUN 2022	Taariikh: 16/03/2022	Bog 7
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 139 XEERKA SIYAASADDA MAAMULKA HAWLAHA HAY'ADAHA SAMAFALKA ISLAAMIGA AH	Taariikh: 19/05/2022	Bog 8
XEER MADAXWEYNE LR. 001 MAGACAABIS LATALIYAHA AMNIGA QARANKA (KMG)	Taariikh: 23/05/2022	Bog 20
XEER MADAXWEYNE LR. 002 MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE (KMG) EE MADAXTOOYADA JFS	Taariikh: 23/05/2022	Bog 21
XEER MADAXWEYNE LR. 003 MAGACAABIS KU-XIGEENKA AGAASIMAHA GUUD (KMG) EE MADAXTOOYADA JFS	Taariikh: 23/05/2022	Bog 22
XEER MADAXWEYNE LR. 004 MAGACAABIS AGAASIMAHA HAB-MAAMUUSKA –CHIEF PROTOCOL- (KMG) EE MADAXTOOYADA JFS	Taariikh: 23/05/2022	Bog 23
XEER MADAXWEYNE LR. 005 MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA JFS EE ARRIMAHA SHARCIGA	Taariikh: 23/05/2022	Bog 24
XEER MADAXWEYNE LR. 006 MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA JFS EE ARRIMAHA DHAQAALAHA	Taariikh: 23/05/2022	Bog 25
XEER MADAXWEYNE LR. 007 MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA ARRIMAHA SIYAASADDA IYO XIRIIRKA BARLAMAANKA	Taariikh: 24/05/2022	Bog 26
XEER MADAXWEYNE LR. 008 MAGACAABIS MADAXA ILAALADA & AMNIGA GAARKA AH EE MADAXWEYNAHA J.F.S. (KMG)	Taariikh: 24/05/2022	Bog 27
XEER MADAXWEYNE LR. 009 MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA J.F.S EE ARRIMAHA DASTUURKA (KMG)	Taariikh: 06/06/2022	Bog 28

XEER MADAXWEYNE LR. 10 Taariikh: 06/06/2022
MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA
ARRIMAHA FEDERAALKA (KMG) **Bog 29**

XEER MADAXWEYNE LR. 11 Taariikh: 13/06/2022
MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA J.F.S
ARRIMAHA DIJITAL-KA (KMG) **Bog 30**

XEER MADAXWEYNE LR. 12 Taariikh: 27/05/2022
AQBALID QO'AANKA GOLAHA WASIIRRADA EE MAGACAABISTA
AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA NABAD-SUGIDDA
& SIRDOONKA QARANKA **Bog 31**

XEER MADAXWEYNE LR. 14 Taariikh: 15/06/2022
MAGACAABIS RA'IISUL-WASAARAHA XUKUUMADDA
FEDERAALKA SOOMAALIYA **Bog 32**

XEER MADAXWEYNE LR. 15 Taariikh: 03/07/2022
MAGACAABIS LA-TALIYAHA ARRIMAHA BULSHADA **Bog 33**

XEER MADAXWEYNE LR. 16 Taariikh: 08/08/2022
MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH EE
MADAXWEYNAHAU QAABILSAN URURKA
BULSHADA BARIGA AFRIKA **Bog 34**

XEER MADAXWEYNE LR. 17 Taariikh: 08/08/2022
MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE MADAXWEYNAHA J.F.S **Bog 35**

XEER MADAXWEYNE LR. 18 Taariikh: 14/08/2022
MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA
ARRIMAHA HAWEENKA IYO XUQUUQUL AADANAHA **Bog 36**

XEER MADAXWEYNE LR. 19 Taariikh: 15/08/2022
DARAJO IYO XAQUUQ SOO CELIN **Bog 37**

XEER MADAXWEYNE LR. 20 Taariikh: 16/07/2022
DALLACSIIN L/SARAAKIIL **Bog 39**

XEER MADAXWEYNE LR. 21 Taariikh: 16/07/2022
DALLACSIIN L/SARAAKIIL **Bog 43**

XEER MADAXWEYNE LR. 22 <i>MAGACAABISKU-XIGEENKA LA-TALIYAHA AMNIGA QARANKA</i>	Taariikh: 16/08/2022 Bog 47
XEER MADAXWEYNE LR. 23 <i>DARAJO IYO XAQUUQ U SOO CELIN</i>	Taariikh: 17/08/2022 Bog 48
XEER MADAXWEYNE LR. 24 <i>AQBALID GO'AANKA GOLAHA WASIIRRADA EE MAGACAABISTA XUBNAHA GUDDIGA MAAMULKA HAY'ADDA MAAREYNATA MUSIIBOYINKA</i>	Taariikh: 17/08/2022 Bog 50
XEER MADAXWEYNE LR. 26 <i>MAGACAABIS LA-TALIYAHA ARRIMAHA BULSHADA EE MADAXWEYNAHA</i>	Taariikh: 24/08/2022 Bog 52
XEER MADAXWEYNE LR. 27 <i>MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA SALIIDA CAYRIIN, GAASKA IYO SHIDAALKA</i>	Taariikh: 31/08/2022 Bog 53
XEER MADAXWEYNE LR. 28 <i>MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH EE GANACSIGA IYO MAALGASHIGA CAALAMIGA AH.</i>	Taariikh: 31/08/2022 Bog 54
XEER MADAXWEYNE LR. 29 <i>MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA EE XIRIIRKA DOWLAD GOBOLEEDYADA</i>	Taariikh: 04/09/2022 Bog 55
XEER MADAXWEYNE LR. 31 <i>MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA EE DIB-U-DHISKA IYO HORUMARINTA</i>	Taariikh: 04/09/2022 Bog 56
XEER MADAXWEYNE LR. 32 <i>MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA GOBOLKA BANAADIR</i>	Taariikh: 06/09/2022 Bog 57
XEER MADAXWEYNE LR. 33 <i>ABUURIDDA XAFIISKA ISKU-DUWIDDA BARNAAMIJYADA SIYAASADDA MADAXWEYNAHA J.F.S</i>	Taariikh: 07/09/2022 Bog 59
XEER MADAXWEYNE LR. 34 <i>MAGACAABIS LA-TALIYEYAAL SARE EE MADAXWEYNAHA J.F.S</i>	Taariikh: 07/09/2022 Bog 61

XEER MADAXWEYNE LR. 35 <i>WAREEJIN SARKAAL</i>	Taariikh: 12/08/2022 Bog 63
XEER MADAXWEYNE LR. 36 <i>DALLACSIIN SARKAAL</i>	Taariikh: 12/08/2022 Bog 64
XEER MADAXWEYNE LR. 38 <i>MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA XIDHIIDHADA CAALAMIGA IYO ISU-DUWIDDA BARNAAMIJYADA</i>	Taariikh: 02/10/2022 Bog 65
XEER MADAXWEYNE LR. 39 <i>WAREEJIN SARKAAL</i>	Taariikh: 12/10/2022 Bog 66
XEER MADAXWEYNE LR. 40 <i>DALLACSIIN SARKAAL</i>	Taariikh: 06/10/2022 Bog 68
XEER MADAXWEYNE LR. 41 <i>WAREEJIN SARKAAL</i>	Taariikh: 06/10/2022 Bog 69
XEER MADAXWEYNE LR. 42 <i>OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO</i>	Taariikh: 11/10/2022 Bog 71
XEER MADAXWEYNE LR. 43 <i>TOOSINTA HABRAACA MAGACAABISTA GUDDIGA GOLAHA ADEEGGA GARSOORKA IYO GUDDIGA LA-DAGAALANKA MUSUQ-MAASUQA</i>	Taariikh: 06/10/2022 Bog 72
XEER MADAXWEYNE LR. 44 <i>MAGACAABIS MAAREEYAHA HAY'ADDA TAYA-DHOWRKA SOOMAALIYEED</i>	Taariikh: 06/10/2022 Bog 74
XEER MADAXWEYNE LR. 45 <i>DALLACSIIN L/SARAAKIIL</i>	Taariikh: 11/10/2022 Bog 75
XEER MADAXWEYNE LR. 46 <i>MAGACAABIS NOOTAAYO</i>	Taariikh: 11/10/2022 Bog 79
XEER MADAXWEYNE LR. 47 <i>MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA CIIDAMADA QALABKA SIDA</i>	Taariikh: 12/10/2022 Bog 80
XEER MADAXWEYNE LR. 48 <i>MAGACAABIS AGAASIMAHA XOG-HAYNNADA IYO ARKIIFIYADA MADAXWEYNAHA</i>	Taariikh: 17/10/2022 Bog 81

XEER MADAXWEYNE LR. 49 Taariikh: 18/10/2022
MAGACAABIS GUDDOOMIYEYAASHA MAXKAMADAHA Bog 82
RACFAANKA IYO GOBOLKA BENAADIR

XEER MADAXWEYNE LR. 50 Taariikh: 19/10/2022
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 84

XEER MADAXWEYNE LR. 51 Taariikh: 19/10/2022
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 85

XEER MADAXWEYNE LR. 52 Taariikh: 19/10/2022
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 86

XEER MADAXWEYNE LR. 53 Taariikh: 19/10/2022
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 88

XEER MADAXWEYNE LR. 54 Taariikh: 19/10/2022
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 89

XEER MADAXWEYNE LR. 55 Taariikh: 19/10/2022
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 90

XEER MADAXWEYNE LR. 56 Taariikh: 19/10/2022
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 92

XEER MADAXWEYNE LR. 57 Taariikh: 19/10/2022
MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA EE DIIWAANKA
RAAD-RAACA WAXYAALAHA QADIIMAHA AH QARANKA Bog 94

XEER MADAXWEYNE LR. 58 Taariikh: 19/10/2022
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 95

XEER MADAXWEYNE LR. 59 Taariikh: 19/10/2022
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 97

XEER MADAXWEYNE LR. 60 Taariikh: 26/10/2022
MAGACAABIS LA TALIYE SARE MADAXWEYNE
DIMOQRAADIYAYNTA IYO DAWLAD WANAAGGA Bog 98

XEER MADAXWEYNE LR. 61 <i>DIB U HABEYN GOLAHA DHAQAALAHA QARANKA (GDQ)</i>	Taariikh: 06/11/2022	Bog 99
XEER MADAXWEYNE LR. 62 <i>XILKA QAADIS IYO MAGACAABIS XUBNAHA GOLAHA DHAQAALAHA QARANKA (GDQ)</i>	Taariikh: 06/11/2022	Bog 101
XEER MADAXWEYNE LR. 66 <i>BURIN XEERARKA MADAXWEYNE EE KALA AH 40, 41 IYO 42, KUWAAS OO AAN WAAFAQSANAYN DASTUURKA KMG AH IYO KALA DIRIDDA GUDDIYADA SIDA AAN DASTUURKA WAAFAQSANEYN LOOGU HOWLGELIYAY</i>	Taariikh: 21/11/2022	Bog 103
XEER MADAXWEYNE LR. 67 <i>XILKA QAADIS IYO MAGACAABIS XUBNAHA GUDDOOMIYE KU-XIGEENNADA GOBALKA BANAADIR</i>	Taariikh: 17/11/2022	Bog 106
XEER MADAXWEYNE LR. 68 <i>MAGACAABIS GUDDOOMIYE-KU-XIGEENKA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA</i>	Taariikh: 27/11/2022	Bog 108
XEER MADAXWEYNE LR. 69 <i>APPOINTMENT OF PRESIDENTIAL ADVISOR ON NATIONAL MARITIME COORDINATION AND BLUE ECONOMY</i>	Taariikh: 29/11/2022	Bog 110
XEER MADAXWEYNE LR. 30 <i>LA-TALIYE SARE AHNA, ERGAYGA GAARKA AH EE XAFIISKA MADAXWEYNAHA U QAABILSAN DHAMAYSTIRKA ARRIMAHA DASTUURKA, GARSOORKA IYO ISKAASHIGA LABADA DAL EE TALYAANIGA IYO SOOMAALIYA</i>	Taariikh: 04/09/2022	Bog 111
GOLAHA AQALKA SARE <i>MAGACAABIS XOG-HAYAHA GUUD EE AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA</i>	Taariikh: 11/12/2022	Bog 113
XEER WASIIR LR. 80 <i>WAREEGTO XEER WASIIR EE LOOGA HAWLGALINAAYO DEKADAHA DALKA "WAKAALADDA SOO BIXINTA, DHOOFINTA, TIRINTA IYO SAHAYDA MARAAKIIBTA.</i>	Taariikh: 15/09/2022	Bog 116
SHARCI LR. 001 <i>ANSIXINTA SHARCIGA QOONDADA MIISAANIYADDA 2023</i>	Taariikh: 31/12/2022	Bog 119

**ANSIXINTA MIISAANIYADDA SEDDEX BILOODLAHA 1^{DA} ABRIL
ILAA 30^{KA} JUUN 2022**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad} Farqadda 1^{aad} iyo Farqadda 2^{aad} ee Dastuurka KMG ah

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'f' ee Dastuurka KMG ah

MARKUU ARKAY: Warqadda Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S. Tix: XRW/344/03/2022, taariikh 13/03/2022, kuna saabsan Ansixinta Miisaaniyadda Seddex Biloodlaha 1^{da} Abriil ilaa 30^{ka} Juun 2022

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo Miisaaniyadda Seddex Biloodlaha 1^{da} Abriil ilaa 30^{ka} Juun 2022

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 16/03/2022



Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

**XEERKA SIYAASADDA MAAMULKA HAWLAHA HAY’ADAHA
SAMAFALKA ISLAAMIGA AH**

RA’IISUL WASAARAHA XUKUUMADDA JFS;

MARKUU ARKAY: Qodobka 99^{aad} (a), (b), (e) iyo (i) ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 100^{aad} (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Soo Jeedinta Wasiirka Awqaafta iyo Arrimaha Diinta

MARKUU ARKAY: Go’aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee Summaddiisu tahay **SHGW.00.137.05.22** ee **19/05/2022** kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Maamulka Hawlaha Hay’adaha Samafalka Islaamiga ah**, oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel-mariyo **Siyaasadda Maamulka Hawlaha Hay’adaha Samafalka Islaamiga Ah.**

MARKUU GARWAAQSADAY: in ay lagama-maarmaan tahay in la sameeyo **Siyaasadda Maamulka Hawlaha Hay’adaha Samafalka Islaamiga ah** taas oo Dowladdy ku ilaalinayso hufnaantooda iyo waajib gudashadooda.

Wuxuu Xeeriyay:

Qodobka 1^{aad}

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.137.05.22** ee **19/05/2022**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Maamulka Hawlaha Hay'adaha Samafalka Islaamiga ah**, oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.


Qodobka 2^{aad}


Waxa Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Diinta, loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana **Siyaasadda Maamulka Hawlaha Hay'adaha Samafalka Islaamiga ah**.

Qodobka 3^{aad}

Xeerka **Siyaasadda Maamulka Hawlaha Hay'adaha Samafalka Islaamiga ah**, waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Maxamed Xuseen Rooble
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA AWQAAFTA IYO ARRIMAHA DIINTA

**SIYAASADDA MAAMULKA HAWLAHA HAY'ADAHA
SAMAFALKA ISLAAMIGA AH**

**Siyaasad Lr _____/2022
MUQDISHO -- SOOMAALIYA**

ARAR

Dalka Soomaaliya waxaa ka howlgala Hay'ado, Jamciyado iyo ururo Samafal Islaami ah, hay'adahan oo isugu jira kuwo Soomaaliyeed, kuwo shisheeye iyo Hay'ado isku dhaf ah.

Hadaba si ay Howlaha Samafal ee Hay'adahaasi fulinayaan u noqdaan hawlo waxtar u leh bulshada Soomaaliyeed waxyeelana aaney uga soo laaban dalka, waxaa loo baahan yahay in la xaqiijiyo hay'adaha iyo shaqsiyaadka ka howlgala iyo howlaha ay u qabanayaan Bulshadeenna Soomaaliyeed kaddibna kormeer joogto ah lagu sameeyo hawlaha ay fulinayaan iyo goobaha ay ka fulinayaanba.

Wasaaradda Awqaafta iyo arrimaha Diinta si ay u xaqiijiso arrimahaas waxay samaysay Siyaasaddan (Siyaasadda Maamulka Howlaha hay'adaha islaamiga ah ee Soomaaliya).

1. ERAY BIXIN:

Haddii aan si kale Siyaasaddan loogu qeexin erayada soo socda waxaa loola jeedaa:-

1.1 Wasaaradda: waxaa loola jeedaa Wasaaradda Awqaafta iyo arrimaha diinta ee JFS.

1.2 Hay'adaha: waxaa loola jeedaa hay'adaha/ Muasasaadka/ Ururada/ Jimciyadaha u nidaamsan samafalka islaamiga ee ka howlgala gudaha Soomaaliya.

1.3 Hay'ad, Jimciyad, urur samafal ama islaami ah: waxaa loola jeedaa koox ka kooban dhowr qof oo rayid ah ama leh shakhsyad qaanuuneed, kuwaas oo qeyb ka ah dhaqdhaqaaq samafal ama bini aadannimo, oo aan ujeedadiisu ahayn faa'iido doon ama siyaasad.

1.4 Oggolaasho: waxaa loola jeedaa Shahaado ama qoraal ka soo baxay Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Diinta, oo ku socda hay'adaha ama jimciyadaha khayriga ee gaarka ah, oo ujeedaduna tahay uruurinta ama helidda kaalmo ama in la diro kaalmo ama la wareejiyo lacago, si loo qabto hawlo samafal ama bini-aadannimo, sida ku cad Siyaasaddan

1.5 Kaalmo ama Tabarucad: waxaa loola jeedaa dhammaan hantida guurtada ama maguurtada ah ee si aan iib ahayn loo siiyo hay'addaha ama jamciyaddaha samafalka, si loogu bixiyo arrimo samafal, dan-guud ama adeeg-bulsho.

2. MAGACA SIYAASADDA:

Siyaasadda Maamulka Howlaha Hay'adaha Samafalka Islaamiga ah ee Soomaaliya.

3. BAAXADDA SIYAASADDA:

Siyaasaddan waxaa lagu Maamulayaa hay'adaha khayriga ee ka dhex shaqeeya gudaha dalka Soomaaliya, waxaana lagu ilaalinayaa xuquuqdooda iyo waajibaadkooda.

4. UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

4.1 Tira-koobka ama Diiwaan-gelinta Hay'adaha khayriga ah ee ka shaqeeya dalka.

4.2 In lagu maamulo howlaha ay qabtaan Hay'adaha khayriga ah ee dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayn, laguna dhowro xuquuqdooda iyo waajibaadkooda.

4.3 Bixinta Shahaadada diiwaangalinta ee hay'adaha Iyo jamciyadaha kheyriga ah ee ka shaqeeya Dalka.

4.4 In la helo hannaan lagu koontarooli karo laguna hubin karo howlaha iyo mashaariicda Horumarinta ay fuliyaan Hay'adaha Khayriga ah.

4.5 Fududeynta howlaha Hay'adaha khayriga ah ee ka shaqeeya dalka si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo.

5. XAQIJIJINTA UJEEDDOOYINKA SIYAASADAN:

Si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka sare ku xusan, Wasaaraddu waxay u mari doontaa habkan hoos ku xusan:-

5.1 In Wasaaraddu diiwaan-geliso Hay'adaha khayriga ah ee ka shaqeeya dalka Soomaaliya.

5.2 In Wasaaraddu xiriir toos ah la yeelato ilaha rasmiga ah ee ay hay'adaha samafalka khayriga ka helaan mashaariicda si loo hubiyo loona kormeero hadii loo baahdo.

5.3 Inuu adeegga samafalka noqdo mid Furan oo aan cid gaar ah u xirneyn, si uu u wanaagsanaado adeegga gargaar ee bulshada loo fidinayo.

5.4 In Wasaaraddu ka bixiso tilmaamo iyo talo-soojeedin la xiriirta goobaha laga fulinayo Howlaha iyo Mashaariicda kheyriga.

5.5 In Wasaaraddu ay daba-gal iyo kormeer ku sameyso Hay'adaha khayriga ah ee ka shaqeeya dalka.

5.6 In Wasaaraddu qabato kana qayb gasho shirarka lagu hormarinayo arrimaha samafalka islaamiga ah ama is dhaafsiga waayo aragnimada ee dalalka islaamka ama dunida.

6. SHURUUDAHA DIIWAAN-GELINTA HAY'ADAHA KHEYRIGA:

Hay'adaha kheyriga ah ee raba inay ka shaqeeyaan adeegga samafalka gudaha dalka waxaa looga baahan yahay inay soo buuxiyaan shuruudahan:

b) Soo-gudbinta codsiga isdiiwaan-gelinta oo qoraal ah;

t) Soo-gudbinta warbixin kooban oo ku aaddan sooyaalka iyo canaawiinta Hay'adaha ama Jamciyadaha;

j) Soo-gudbinta Xeer-hoosaadka Hay'adda kheyriga ah oo la soo marsiiyay Nootaayo sharci ah;

x) Hay'adda Samafalka ah waa inay xarun (Xafiis) lagala xiriiri karo oo shaqaynaya ku leedahay gudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya;

Kh) Hay'ad iyo Jimciyad walba waa inay bixisaa khidmada loogu adeegayo;

d) Warqadda caddeynta dambi-la'aanta oo laga rabo guddoomiyaha Hay'adda; iyo

r) In Magaca Hay'adda la diiwaan-gelinayo uusan ahayn mid horey hay'ad kale loogu diiwan-geliyay.

6.1 Hadii loo baahdo shuruudo dheeriya Wasiirka Wasaaradda ayaa habraac gaar ah ku soo saaraya.

7. NIDAAMINTA HAY'ADAHA

7.1 Wasaaraddu waxay ka shaqeynaysaa horumarinta, taageeridda iyo gacan-siinta Hay'adaha ka shaqeeya hawlaha khayriga ah, si ay u gaaraan yoolkooda.

7.2 Ma bannaana in Hay'ad khayri ah ay magaca Dawladda Soomaaliya u adeegsato Hawlo ka horimanaaya danta guud ee Qaranka.

8. KORMEERIDDA HAWLAHA SAMAFALKA

8.1 Wasaaradda ama cidda ay u xil saarato ayaa mas'uul ka ah kormeerka hay'adaha samafalka Islaamiga ah, iyadoo loo marayo shuruudaha ay wasaaraddu u dejisay.

8.2 Wasaaraddu waxay shatiga kala noqonaysaa hay'addii ay ku caddaato xil gudasho la'aan ama lunsii hanti, ama u hogaansami weyda awaamirta Wasaaradda.

8.3 Siyaasaddani waxay kormeeraysaa dabagalna ku sameynaysaa qeybaha hoos ku xusan:-

b) Dhammaan Hay'adaha khayriga ah ee dalka ka hawlgala;

t) Qeybaha kale ee haysta oggolaasho toos ah oo ay ku qabtaan hawlo samafal Islaami ah ama bani-aadannimo ah, sida ku cad Siyaasaddan; iyo

j) Dadka loo oggolaaday inay uruurin karaan kaalmo ama tabarucaad, ama doonaya inay diraan lacago ujeeddadoodu tahay samafal ama bini-aadannimo.

9. URUURIN TABARUCAAD SAMAFAL:

Lama oggola inay hay'ad ama dad kale ay lacago ka uruuriyaan gudaha dalka, iyagoo aan oggolaasho rasmi ah ka haysan Wasaaradda.

10. U-HOGAANSANAAN KORMEER

10.1 Waa in hay'adaha ama jimciyadaha ay u hogaansamaan kormeerka ama daba-galka Wasaaradda, iyagoo soo gudbinaya dhammaan warbixinnada ama dukumintiyada laga doonayo, si gacan loo siiyo loona hubiyo shaqadooda.

10.2 Wasaaraddu waxay soo saaraysaa habraacyo ku saabsan Kormeerka iyo Daba-galka hay'adaha iyo Jimciyadaha.

11. SHURUUDAHA AASAASIDDA HAY'AD SAMAFAL

11.1 Si loo asaaso jimciyad samafal waa in la buuxiyaa shuruudahan soo-socda:

b) In tirada dadka aasaasaya aysan ka yareyn 3 qof;

t) Inay iska bixiyaan qarashka diiwaan-gelinta, kaasoo lagu soo-saarayo go'aan Wasaaradeed; iyo

j) Xubinta ka mid noqonaysa asaasidda jimciyadda Gudaha ama ku biiraysa waxaa laga doonayaa waxyaabahan:-

I. Inuu Soomaali yahay;

II. Inaysan da' da aasaasayaasha ka yarayn 18 sano;

III. Inaysan hore maxkamadi ugu xukumin xukun kama dambeys ah, arrin la xiriirta sharaf ama amaano;

IV. Inuu leeyahay sumcad, sharaf ama sooyaal suubban; iyo

V. inuusan gacan-saar la lahayn ururada mamnuuca ka ah dalka.

11.2 Wasaaraddu waxay dhiiri-gelineysaa in hay'adaha Islaamiga gudaha sameystaan dallado iskaashato, si loo xoojiyo hawlaha samafalka islaamiga ah ee dalka.

12. U-HOGAANSANAANTA SIYAASADDA:

Dhammaan jimciyadaha samafalka ah waa inay u hogaansamaan qorshe-hawleedyada, habraacyada iyo go'aanadda waafaqsan siyaasadan ee ka soo-baxa wasaaradda.

13. MAALGASHI HANTI SAMAFAL:

Hay'adaha iyo Jamciyadaha waxay xaq u leeyihiin inay maalgashi sameyn karaan si nacfiga kasoo baxa dib ugu celiyaan howlaha samalka marka ay Wasaaraddu oggolaato.

14. FUDUDEYNTA BAAHIYAHA HAY'ADAHA

14.1 Wasaaraddu waxay hay'adaha samafalka u fududeyneysaa arrimaha ay uga baahan yihiin dibadda ama gudaha. Sida helista shahaadada diiwaagelinta, codsiga canshuur dhaafka, fududeynta xirirrada gudaha ama dibadda iyo tababarriddooda.

14.2 Sidoo kale Wasaaradda waxay siin kartaa hay'adda khayriga ah kaalmo lacageed, si ay dadka wax ugu qabato.

15. KHIDMADA ADEEGYADA HAY'ADAHA

15.1 Adeegyada kala duwan ee Wasaaraddu u fidiso hay'adaha iyo Jamciyadaha sida Diiwaangelinta Hay'adaha iyo jamciyadaha, cusboonaysiinta shahaadada isdiiwaan-gelinta iyo adeegyada kale waxaa khidmadahaas wareegto kusoo saari doona Wasiirka Wasaaradda.

15.2 Adeegyada loo qabanayo Hay'adaha, Jamciyadaha, Ururrada, Samafalka Islaamiga ah ee aan wadaniga ahayn (Soomaali ahayn) Ujuurada Adeega waxaa dheeri ku noqonaaya 30%.

15.3 Hay'adaha, Jamciyadaha iyo Ururada Samafalka Islaamiga ah, waxaa loo kala qeybinayaa sidan:

b) Hay'ad Samafal Islaami Soomaali ah: Waa Hay'ad Dhammaan aasaasayaasheedu ay yihiin Soomaali;

t) Hay'ad Samafal Islaami shisheeye ah: Waa Hay'a'd Dhammaan aasaasayaasheedu ay yihiin Ajaanib; iyo

j) Hay'ad Samafal islaami Isku-jir ah: Waa Hay'ad aasaasayaasheedu iskugu jiraan Soomaali iyo Ajnabi waxaa Loo eegayaa mar walba Cidda u Badan.

16. QANDARAASYADA SAMAFALKA:

Qandaraas walba oo quseeya fulinta Mashaariicda Hay'adaha Khayriga ah waa in laga soo diiwaan-geliyaa Wasaaradda ka hor inta aan la fulin.

17. RUKHSAD KALA NOQOSHO

17.1 Wasaaraddu waxay Rukhsadda Hay'adaha khayriga ah kala noqonaysaa haddii:

b) Hay'addu jabiso Siyaasaddan ama Habraaycada Wasaaradda ee la xiriira siyaasaddan;

t) Hay'addu ay ka qeyb-gasho arrimo siyasadeed; ama

j) Haddii ay Wasaaraddu u caddaato in hay'ad ama jamciyad ay gasho dambi ka hor imaanaya Siyaasaddan, waxaa la marayaa tallaabooyinkan soo socda:-

I. Digniin Qoraal ah; ama

II. Rukhsad kala Noqosho.

18. LA TIIGSIGA SHARCIGA

18.1 Hay'addii ama jamciyaddii ku kacda qodobada Hoos ku qoran waxaa lala tiigsanayaa sharciga:

b) Haddii ay sii wadato hawl-laheeda iyadoo lagala noqday Rukhsadda; iyo

t) Haddii ay ku kacdo been-abuur iyo musuq-maasuq; iyo

j) Haddii ay qabato hawlo mamnuuc ka ah hay'adaha samafalka, ama khilaafsan shaqada loo oggolaaday.

18.2 Dhammaan fal-dambiyeedyada ku xusan faqradan waxaa lagu qaadayaa si waafaqsan (XCS IYO XHC).

19 XEER HOOSAADYADA IYO HABRAACYADA KALE:

Wixii aan ku jirin qodobada Siyaasaddan oo xiriir la leh hawlaha hay'adaha samafalka Islaamiga ah, waxaa lagu maamuli doonaa habraacyo iyo Xeer-hoosaadyo gaar ah oo ay Wasaaraddu soo saareyso sida: daqar-soonka (Zakaatul fidriga), Udxiyada, afurinta bisha Ramadaan.

20 DHAQAN-GALKA SIYAASADA:

Siyaasadani waxay dhaqan-galeysaa marka ay ansixiyaan Golaha Wasiirada ee Xukuumada Federaalka Soomaaliya.

21 WAX KA BEDELKA SIYAASADA:

Wax ka bedelka Siyaasadani waxaa awood u leh Golaha Wasiirada ee Xukuumada Federaalka Soomaaliya, marka ay helaan soo jeedinta Wasaaradda Awqaafta iyo arr. Diinta.

ALLAA MAHADLEH,,,,

WASAARADDA AWQAAFTA IYO ARRIMAHA DIINTA JFS

MAGACAABIS LA-TALIYAHA AMNIGA QARANKA (KMG)

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee JFS

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Lataliye Amniga Qaranka

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo khibradda uu masuulka loo magacaabay xilkan u leeyahay howlaha la xiriira amniga Qaranka

Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan magaabis:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 23-ka Maajo 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay Md. **Xuseen Sheekh Cali** in uu noqdo La-taliyaha Amniga Qaranka si KMG ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 23/05/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD (KMG) EE MADAXTOOYADA JFS

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee JFS

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Agaasimaha Guud (KMG) ee ay yeelato Madaxtooyada JFS

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo khibrada uu masuulka loo magacaabay xilkan u leeyahay howlaha la xiriira Maamulka Madaxtooyada JFS

Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan magaabis:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 23-ka Maajo 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay Md. **Xuseen Sheekh Maxamuud Xuseen** in uu noqdo Agaasimaha Guud si (KMG) Madaxtooyada JFS.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 23/05/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**MAGACAABIS KU-XIGEENKA AGAASIMAHA GUUD (KMG) EE
MADAXTOOYADA JFS**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee JFS

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Agaasime Guud Ku-xigeen (KMG) ee ay yeelato Madaxtooyada JFS

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo khibrada uu masuulka loo magacaabay xilkan u leeyahay howlaha la xiriira Maamulka Madaxtooyada JFS

Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan magaabis:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 23-ka Maajo 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay Md. **Maxamed Amiin Sheekh Cusmaan** in uu noqdo Agaasimaha Guud Ku-xigeenka Madaxtooyada JFS si (KMG).

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 23/05/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**MAGACAABIS AGAASIMAHA HAB-MAAMUUSKA – CHIEF
PROTOCOL (KMG) EE MADAXTOOYADA JFS**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee JFS

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Agaasimaha Hab-maamuuska – Chief Protocol - (KMG) ee ay yeelato Madaxtooyada JFS

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo khibrada ay marwada loo magacaabay xilkan u leedahay howlaha la xiriira hab-maamuuska.

Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan magaabis:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 23-ka Maajo 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay Marwo **Hinda Axmed Cali** in ay noqoto Agaasimaha Hab-maamuuska – Chief Protocol - Madaxtooyada JFS si KMG ah

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 23/05/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA JFS EE ARRIMAHA SHARCIGA (QAANUUNKA) – KMG-

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee JFS

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-taliye Madaxweyne (KMG) ah ee Arrimaha Qaanuunka

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo khibrada uu masuulka loo magacaabay xilkan u leeyahay sharciga iyo qaanuunka

Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan magaabis:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 23-ka Maajo 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay Md. **Ibraahim Iidle Suleymaan** in uu noqdo La-taliyaha Madaxweynaha JFS dhinaca sharciga (qaanuunka) si (KMG) ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 23/05/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA JFS EE ARRIMAHA
DHAQAALAHA –KMG-**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee JFS

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-taliye Madaxweyne (KMG) ah ee Arrimaha Dhaqaalaha

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo khibrada uu masuulka loo magacaabay xilkan u leeyahay dhaqaalaha

Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan magacbis:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 23-ka Maajo 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay Md. **Xasan Aadan Hoosow** in uu noqdo La-taliyaha Madaxweynaha JFS dhinaca Dhaqaalaha si (KMG) ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 23/05/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA JFS EE ARRIMAHA
SIYAASADDA IYO XIRIIRKA BAARLAMAANKA (KMG)**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabay xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-Taliye Sare e Madaxweynaha oo aqoon fiican u leh arrimaha siyaasadda iyo xiriirka Baarlamaanka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 24-ka Maajo 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay Md. **Zakaria Hassan Ali** in uu noqdo La-Taliye Sare Madaxweynaha J.F.S ee arrimaha siyaasadda iyo xiriirka Baarlamaanka si (KMG) ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 24/05/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**MAGACAABIS MADAXA ILAALADA & AMNIGA GAARKA AH EE
MADAXWEYNAHA J.F.S (KMG)**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabay xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir ilaalada & amniga oo aqoon fiican u elh arrimaha ilaalada & amniga

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 25-ka Maajo 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay **G/le Maslah Mohamud Mohamed** in uu noqdo Madaxa ilaalada & Amniga Gaarka ah ee Madaxweynaha J.F.S. si (KMG) ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 25/05/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA J.F.S EE
ARRIMAHA DASTUURKA (KMG)**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabay xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir La-Taliye Sare ee Madaxweynaha oo aqoon fiican u leh arrimaha Dastuurka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 06-da Juun 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay **Dr. Cabdiraxmaan Cabdullaahi (Baadiyow)** in uu noqdo La-Taliye Sare Madaxweynaha J.F.S. ee arrimaha Dastuurka si (KMG) ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 06/06/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA J.F.S EE
ARRIMAHA FEDERAALKA (KMG)**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabay xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir La-Taliye Sare ee Madaxweynaha oo aqoon fiican u leh arrimaha Federaalka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 06-da Juun 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay **Mudane Axmed Cabbaas Axmed** in uu noqdo La-Taliye Sare Madaxweynaha J.F.S. ee arrimaha Federaalka si (KMG) ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 06/06/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA J.F.S EE
ARRIMAHA DIJITAAL-KA (KMG)**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabay xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-Taliye Madaxweyne oo aqoon fiican u leh Arrimaha Dijitaalka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 13-ka Juun 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay **Dr. Yuunis Ali Ahmed** in uu noqdo La-Taliyaha Arrimaha Dijitaalka ee Madaxweynaha J.F.S. si (KMG) ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 13/06/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**AQBALID GO'AANKA GOLAHA WASIIRRADA EE MAGACAABISTA
AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA NABAD-SUGIDDA &
SIRDOONKA QARANKA**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 90^{aad} iyo 87^{aad} Farqadda 2^{aad} ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 14 ee soo baxay 15 Febraayo 1970 kuna saabsan Dhismaha Hay'adda Nabad-Sugidda & Sirdoonka Qaranka .

MARKA UU ARKAY: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summadiisu tahay SHGW.00.138.05.22 ee 26/05/2022 iyo soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S ee summadiisu tahay XRW/357/05/2022 ee 26/05/2022 kuna saabsan Ansixinta Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda Nabad-sugidda & Sirdoonka Qaranka.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda Nabad-Sugidda & Sirdoonka Qaranka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 27-da Maajo 2022, Madaxweynuhu u magacaabay Mudane **Mahad Maxamed Salaad** in uu noqdo Agaasimaha Guud ee Hay'adda Nabad-Sugidda & Sirdoonka Qaranka.

Qodobka 2^{aad}

Waxa uu xeerkaan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 27/05/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**MAGACAABIS RA'IISUL WASAARAH A XUKUUMADDA
FEDERAALKA SOOMAALIYA**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 90^{aad} Faqradda 'd' ee Dastuurka KMG

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo dhismaha hay'adaha dowladda gaar ahaan buuxinta Jagada Ra'iisul Wasaaraha ka dib doorashooyinkii dalka ka dhacay

MARKA UU TIXGELIYAY: Waayo-aragnimada iyo aqoonta uu leeyahay mudanaha Loo magacaabay xilkan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 15-ka Juun 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay Mudane **Xamse Cabdi Barre** in uu noqdo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 15/06/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

MAGACAABIS LA-TALIYAHA ARRIMAHA BULSHADA (KMG)

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leedahay marwada loo magacaabay xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir aqoon fiican u leh arrimaha bulshada

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 03-da Luulyo 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay **Marwo Halima Ali Ulusow** in ay noqoto La-Taliyaha Arrimaha Bulshada ee Madaxweynaha J.F.S. si (KMG) ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 03/07/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

**APPOINTMENT OF PRESIDENTIAL ENVOY TO EAST
AFRICAN COMMUNITY**

THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Having seen: Article 87th of the provisional constitution of the Federal Republic of Somalia

Having seen: Article 90th of the provisional constitution of the Federal Republic of Somalia

Having seen: The qualifications and experience the official posses for the post.

Having considered: The need to appoint Presidential Envoy to East African Community

DECREES THE FOLLOWING:


Article One

Starting from today 08 August 2022, the President has appointed Dr. **Abdusalam Hadliyeh Omer** as the **Presidential Envoy to East African Community**.

Article Two

This decree shall come into force and effective once the President of the F.R.S signs it and it will be published in the Official Bulletin of the Federal Republic of Somalia.

Mogadishu: 08/08/2022



Hassan Sheikh Mohamud
President of the Federal Republic of Somalia

APPOINTMENT OF SENIOR ADVISOR TO THE PRESIDENT

THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Having seen: Article 87th of the provisional constitution of the Federal Republic of Somalia

Having seen: Article 90th of the provisional constitution of the Federal Republic of Somalia

Having seen: The qualifications and experience the official posses for the post.

Having considered: The need to appoint a Senior Advisor of the President

DECREES THE FOLLOWING:


Article One

Starting from today 08 August 2022, the President has appointed Mr. **Ahmed Abdisalan Hirsi** as the **Senior Advisor of the President**.

Article Two

This decree shall come into force and effective once the President of the F.R.S signs it and it will be published in the Official Bulletin of the Federal Republic of Somalia.

Mogadishu: 08/08/2022



Hassan Sheikh Mohamud
President of the Federal Republic of Somalia

MAGACAABIS LA-TALIYAHA ARRIMAHA HAWEENKA IYO XUQUUQUL INSAANKA (KMG)

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leedahay Marwada loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir La-Taliye Arrimaha Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:


Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 14-ka August 2022, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu u magacaabay **Marwo Muna Cumar Xasan** in ay noqoto La-Taliyaha Madaxweynaha J.F.S ee Arrimaha Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka si (KMG) ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu Dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 14/08/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

DARAJO IYO XUQUUQ SOO CELIN

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Farqadda 1^{aad}, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90^{aad}, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 2 ee 23/12/1973 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed.

MARKUU GARWAAQSADAY: Muhiimadda ay leedahay in dib loogu soo celiyo xuquuqdii iyo darajadiisii ciidanimu.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa darajadiisii iyo xuquuqdiisii ciidannimo ee Ciidanka Booliiska Dalka Soomaaliyeed dib loogu soo celiyay sarkaalka magaciisa iyo darajadiisu hoos ku xusan tahay.

No.	Darajo	Magaca	Derajo dib ugu soo celin
1.	S/Guuto	Saadaq Cumar Maxamed	S/Guuto

Qodobka 2^{aad}

Sarkaalkaan ku tilmaaman xeerkan waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ee sharciga oggol yahay.


Qodobka 3^{aad}

Xeerkani waxa uu baabi'inayaa wixii xeer ah ee ka horreeyay, kana hor imaanaya.

Qodobka 4^{aad}

Waxa uu Xeerkan Dhaqan-galayaa marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 15/08/2022

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIWAAN NO: <u>HAN-27-22</u>
TAARIKH: <u>19-10-2022</u>
SAXIIXA: 
HANTIDHAWRAHA GUUD Md. Maxamed Maxamuud Cali

Madaxweynaha J.F.S
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

DALLACSIIN L/SARAAKIIL

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, iyo 90^{aad} ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed XTC/XDS/1467/21 Taariikh: 15/08/2021 kuna saabsan Dallacsiin L/Saraakiil

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la Dallacsiyo L/Saraakiishan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkan, waxaa L/Saraakiisha uu magacyadoodu hoos ku xusan yahay loo dallacsiyey darajada ku hor qoran mid kasta iyaga oo ka mid ah Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

<i>Tr.</i>	<i>Darajo</i>	<i>Nambar</i>	<i>Magac</i>	<i>Darajada u Dallacay</i>
1.	L/Sarkaal	X/41463	Maxamed Nuur Cabdulahi Ibrahim	X/Le
2.	L/Sarkaal	X/41464	Waliid Cabdi Shire Curey	X/Le
3.	L/Sarkaal	X/41465	Cumar Maxamed Xasan Max'ud	X/Le
4.	L/Sarkaal	X/41466	Hanad Xasan Cali Geesey	X/Le
5.	L/Sarkaal	X/41467	Maxamed Daaud Muuse Kaarshe	X/Le
6.	L/Sarkaal	X/41468	Mahad Cilmi Caalin Afrax	X/Le
7.	L/Sarkaal	X/41469	Axmed Mukhtar Haaruun Cusman	X/Le
8.	L/Sarkaal	X/41470	Axmed Aadan Maxamed Xasan	X/Le
9.	L/Sarkaal	X/41471	Axmed Aways Maxamed Ibrahim	X/Le
10.	L/Sarkaal	X/41472	Sakariye Axmed Suleymaan	X/Le

11.	L/Sarkaal	X/41473	Cabdullaahi Cabdi Cali Faarax	X/Le
12.	L/Sarkaal	X/41474	Liibaan Xasan Faarax Cilmi	X/Le
13.	L/Sarkaal	X/41475	Cumar Cali Ibraahim Siyaad	X/Le
14.	L/Sarkaal	X/41476	Cabdirahman Cali Warsame Xeyle	X/Le
15.	L/Sarkaal	X/41477	Cabdiqaadir Xasan Max'ed Ibrahim	X/Le
16.	L/Sarkaal	X/41478	Maxamed Muuse Nuur Ciise	X/Le
17.	L/Sarkaal	X/41479	Yaxye Axmed Warsame Nuur	X/Le
18.	L/Sarkaal	X/41480	Cali Nuur Cabdullahi Nuur Isaaq	X/Le
19.	L/Sarkaal	X/41481	Cabdiraxman Max'ed Yusuf Warsame	X/Le
20.	L/Sarkaal	X/41482	Ibraahim Maxamed Xasan	X/Le
21.	L/Sarkaal	X/41483	Cabdullaahi Cali Suudi Afrax	X/Le
22.	L/Sarkaal	X/41484	Cabdirisaaq Max'ed Jamac Cumar	X/Le
23.	L/Sarkaal	X/41485	Axmed Daahir Faarax Cabdulle	X/Le
24.	L/Sarkaal	X/41486	Mowliid Cabdi Xasan Axmed	X/Le
25.	L/Sarkaal	X/41487	Yuusuf Maxamuud Axmed Muse	X/Le
26.	L/Sarkaal	X/41488	Cabdicasis Maxamed Cabdulle Tortorey	X/Le
27.	L/Sarkaal	X/41489	Mursal Cabdi Shariif Maxamed	X/Le
28.	L/Sarkaal	X/41490	Caydaruus Max'ed Cabdulle Cusman	X/Le
29.	L/Sarkaal	X/41491	Daahir Nuur Sharawe Jaamow	X/Le
30.	L/Sarkaal	X/41492	Maxamed Cabdi Cali Gacal	X/Le
31.	L/Sarkaal	X/13336	Xasan Cabdi Ibraahim Xuseen	X/Le
32.	L/Sarkaal	X/41493	Gallad Cali Xaashi Cilmi	X/Le
33.	L/Sarkaal	X/41494	Saacid Cabdullaahi Axmed Sadiiq	X/Le
34.	L/Sarkaal	X/41495	Sadiiq Maxamed Axmed Maxamed	X/Le
35.	L/Sarkaal	X/41496	Muxidiin Bashiir Cabdi Saneey	X/Le

36.	L/Sarkaal	X/41497	Maxamed Mahad Cali Cabdulle	X/Le
37.	L/Sarkaal	X/41498	Mustaf Cabdullahi Max'ed Cabdi	X/Le
38.	L/Sarkaal	X/41499	Siciid Cabdullahi Maxamed Nuur	X/Le
39.	L/Sarkaal	X/41500	Cabdullahi Cabdiraxman Sharif Xaji	X/Le
40.	L/Sarkaal	X/41501	Xuseen Cali Xasan Gaafow	X/Le
41.	L/Sarkaal	X/41502	Bilaal Yuusuf Cali Bilaal	X/Le
42.	L/Sarkaal	X/41503	Axmed Daa'uud Maxamed Abuukar	X/Le
43.	L/Sarkaal	X/41504	Cali Cabdullahi Xuseen Nuuriye	X/Le
44.	L/Sarkaal	X/41505	Guuleed Cismaan Cabdulle Xurshow	X/Le
45.	L/Sarkaal	X/41506	Cabdirisaaq Maxamed Sh. Ibraahim	X/Le
46.	L/Sarkaal	X/41507	Shuceyb Axmed Maxamed Cabdi	X/Le
47.	L/Sarkaal	X/41508	Cabdirashiid Max'ed Ismacil Cumar	X/Le
48.	L/Sarkaal	X/41509	Maxamed Saciid Cusman Warsame	X/Le
49.	L/Sarkaal	X/35399	Cabdifataax Maxamed Axmed Abukar	X/Le
50.	L/Sarkaal	X/41510	Maxamed Muumin Iiman Cali	X/Le
51.	L/Sarkaal	X/35348	Cabdiraxman Max'ed Axmed Calasow	X/Le
52.	L/Sarkaal	X/41511	Maxamed Iiman Xasan Jirow	X/Le
53.	L/Sarkaal	X/41512	Cabdiwali Cabdullaahi Cali Xaashi	X/Le
54.	L/Sarkaal	X/41513	Cali Yuusuf Xuseen Yuusuf	X/Le
55.	L/Sarkaal	X/41514	Maxamed Cabdisalan Tahlil Jaamac	X/Le
56.	L/Sarkaal	X/41515	Cabdiraxmaan Cali Cumar Warsame	X/Le
57.	L/Sarkaal	X/41516	Cabdullahi Axmed Macallin Xuseen	X/Le
58.	L/Sarkaal	X/41517	Khaliil Cabdalla Warsame Cabdi	X/Le
59.	L/Sarkaal	X/41518	Cabdiqani Aadan Warsame Faarax	X/Le
60.	L/Sarkaal	X/41519	Cabdiraxman Axmed Jaamac Aadan	X/Le

61.	L/Sarkaal	X/41520	Maxamed Dahir Xuseen Wehliye	X/Le
62.	L/Sarkaal	X/41521	Aadam Shariif Cali Ibraahim	X/Le
63.	L/Sarkaal	X/41522	Max'ed Cabdiraxman Max'ed Wehliye	X/Le
64.	L/Sarkaal	X/41523	Liibaan Xuseen Maxamed Tuuryare	X/Le
65.	L/Sarkaal	X/41524	Cabdullahi Cabdisatar Cabdisalan Xasan	X/Le
66.	L/Sarkaal	X/41525	Cabduqadir Muxidin Cusman Xasan	X/Le
67.	L/Sarkaal	X/41526	Liibaan Maxamed Cali Abshir	X/Le
68.	L/Sarkaal	X/41527	Bashiir Cabdullahi Maxamed Ibrahim	X/Le
69.	L/Sarkaal	X/41528	Cabdirisaaq Cabdullahi Mooge Axmed	X/Le
70.	L/Sarkaal	X/41529	Cabdi Baasid Maxamed Ibraahim	X/Le
71.	L/Sarkaal	X/41530	Cabdulkariim Cali Fiidow Jimcaale	X/Le
72.	L/Sarkaal	X/41531	Cabdirashiid Max'ed Cilmi Cawaale	X/Le
73.	L/Sarkaal	X/41532	Yuusuf Abuukar Yuusuf Maxamed	X/Le
74.	L/Sarkaal	X/41533	Cabdikaafi Cusmaan Jaama Wehliye	X/Le
75.	L/Sarkaal	X/41534	Ismaaciil Cali Axmed Cabdi	X/Le
76.	L/Sarkaal	X/41535	Cabdiraxmaan Maxamud Maxamed	X/Le
77.	L/Sarkaal	X/41536	Xuseen Xasan Nuur Maxamed	X/Le
78.	L/Sarkaal	X/7006	Maxamed Cali Maxamuud Axmed	X/Le


Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxa ay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ee sharcigu oggol yahay

Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S

MUQDISHO: 16/08/2022



Madaxweynaha J.F.S
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud

DALLACSIIN L/SARAKIIL

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, iyo 90^{aad}, Xarafka ‘B’ ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed XTC/XDS/2249/22 Taariikh: 10/08/2022 kuna saabsan Dallacsiin L/Saraakiil

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la Dallacsiyo L/Saraakiil

Waxa uu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkan, waxaa L/Saraakiisha Magacyadoodu hoos ku xusan yahay loo dallacsiyey darajada ku hor qoran mid kasta iyaga oo ka mid ah Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Tr.	Darajo	L.Ciidan	Magaca	U Dallacaayo
1.	L/Sarkaal	X/48427	Carafat Bashiir Maxamuud	X/le
2.	L/Sarkaal	X/48428	Cabdishakuur Xasan Cabdiwaxid	X/le
3.	L/Sarkaal	X/48429	Mukhtar Cali Maxamed	X/le
4.	L/Sarkaal	X/48430	Maxamed C/ladiif Xasan	X/le
5.	L/Sarkaal	X/48431	Cabdifataax Daahir Jaamac	X/le
6.	L/Sarkaal	X/48432	Ibraahim Cali Yuusuf	X/le
7.	L/Sarkaal	X/48433	Axmed Maxamed Nuur	X/le
8.	L/Sarkaal	X/48434	Cabdisalaan Axmed Cabdulqadir	X/le
9.	L/Sarkaal	X/48435	Maxamed Cabdirisaaq Yuusuf	X/le
10.	L/Sarkaal	X/48436	Maxamed Waaberi Cumar	X/le
11.	L/Sarkaal	X/48437	Barre Isaaq Maxamed	X/le
12.	L/Sarkaal	X/48438	Muxsin Cali Axmed	X/le
13.	L/Sarkaal	X/48439	Maxamed Cali Nuur	X/le
14.	L/Sarkaal	X/48440	Maxamed Xasan Saciid	X/le
15.	L/Sarkaal	X/48441	Ayaanle Daahir Caseeyr	X/le
16.	L/Sarkaal	X/48442	Fahad Axmed Saciid	X/le
17.	L/Sarkaal	X/48443	Maxamed Cabdullaahi Abuukar	X/le

18.	L/Sarkaal	X/48444	Axmed Faarax Diiriye	X/le
19.	L/Sarkaal	X/48445	Ibraahim Cabdullaahi Cumar	X/le
20.	L/Sarkaal	X/48446	Cabdiqani Rooble Xasan	X/le
21.	L/Sarkaal	X/48447	Maxamed Bashiir Maxamed	X/le
22.	L/Sarkaal	X/48448	Xammad C/rashiid Xirsi	X/le
23.	L/Sarkaal	X/48449	Cabdiraxmaan Maxamed Axmed	X/le
24.	L/Sarkaal	X/48450	Mustafa Aadan Jaamac	X/le
25.	L/Sarkaal	X/48451	Axmed Muuse Cabdi	X/le
26.	L/Sarkaal	X/48452	Cabdiraxmaan Cali Ciise	X/le
27.	L/Sarkaal	X/48453	Axmed Bashiir Xuseen	X/le
28.	L/Sarkaal	X/48454	Faarax Axmed Cabdulle	X/le
29.	L/Sarkaal	X/48455	Axmed Maxamed Xuseen	X/le
30.	L/Sarkaal	X/48456	Cabdirisaq Axmed Cabdiraxman	X/le
31.	L/Sarkaal	X/48457	Cabdullaahi Yuusuf Cali	X/le
32.	L/Sarkaal	X/48458	Cabdinaasir Yuusuf Saciid	X/le
33.	L/Sarkaal	X/48459	Axmed Cabdisalaan Cali	X/le
34.	L/Sarkaal	X/48460	Muuse Faarax Yuusuf	X/le
35.	L/Sarkaal	X/48461	Axmed Cartan Saciid	X/le
36.	L/Sarkaal	X/48462	Sakariye Cabdalla Xasan	X/le
37.	L/Sarkaal	X/48463	Liibaan Muxudiin Aadan	X/le
38.	L/Sarkaal	X/48464	Maxamed Cabdiladiif Cigaal	X/le
39.	L/Sarkaal	X/48465	Ismaaciil Ciise Maxamed	X/le
40.	L/Sarkaal	X/48466	Cabdiraxmaan Cali Yuusuf	X/le
41.	L/Sarkaal	X/48467	Axmed Maxamuud Cabdullaahi	X/le
42.	L/Sarkaal	X/48468	Mursal Cumar Cabdiraxmaan	X/le
43.	L/Sarkaal	X/48469	Aadan C/naasir Xaashi	X/le
44.	L/Sarkaal	X/48470	Ismaaciil Xasan Axmed	X/le
45.	L/Sarkaal	X/48471	Sayid Cali Amiin Cali	X/le
46.	L/Sarkaal	X/48472	Xasan Maxamuud Toowow	X/le
47.	L/Sarkaal	X/48473	Cali Maxamed Cismaan	X/le
48.	L/Sarkaal	X/48474	Axmed Yuusuf Cabdiraxmaan	X/le
49.	L/Sarkaal	X/48475	Abshir Shaafici Ibraahim	X/le
50.	L/Sarkaal	X/48476	Xareed Maxamed Tahliil	X/le
51.	L/Sarkaal	X/48477	Salax Saciid Maxamed	X/le
52.	L/Sarkaal	X/48478	Axmed Cumar Maxamed	X/le
53.	L/Sarkaal	X/48479	Cabdulqaadir Cabdirisaq Amiin	X/le

54.	L/Sarkaal	X/48480	Cabdinaasir Ibraahim Xuseen	X/le
55.	L/Sarkaal	X/48481	Sahal Cabdullaahi Xasan	X/le
56.	L/Sarkaal	X/48482	Cumar Axmed Xuseen	X/le
57.	L/Sarkaal	X/48483	Sahal Cabdisamad Ismaaciil	X/le
58.	L/Sarkaal	X/48484	Axmed Sadiiq Cabdi Xoosh	X/le
59.	L/Sarkaal	X/48485	Cabdullaahi Xasan Maxamed	X/le
60.	L/Sarkaal	X/48486	Cabdiwaaxid Shire Maxamed	X/le
61.	L/Sarkaal	X/48487	Daahir Sh. Axmed Maxamed	X/le
62.	L/Sarkaal	X/48488	Sakariye Xasan Nuur	X/le
63.	L/Sarkaal	X/48489	Liibaan C/Nuur C/Laahi Kibar	X/le
64.	L/Sarkaal	X/48490	Cabdinuur Maxamed Garaad	X/le
65.	L/Sarkaal	X/48491	Sayid Ali Cumar Maxamed	X/le
66.	L/Sarkaal	X/48492	Cabdinuur Cali Cabdi	X/le
67.	L/Sarkaal	X/48493	Mowliid Cali Maxamed	X/le
68.	L/Sarkaal	X/48494	Ismaaciil Burhaan Jamac	X/le
69.	L/Sarkaal	X/48495	Cabdisalaan Cabdiraxmaan Khaliif	X/le
70.	L/Sarkaal	X/48496	Ibraahim Qaasim Maxamed	X/le
Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u oggolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah gacan ku dhiigle Shabaab **Xasan Cali Maxamed Barre (Xasan Boy)** 24 jir ah, ina Faadumo Maxamed Abuukar ku dhashay Sh/hoose deggan Wadajir, kadib markii isagoo ka tirsan kooxda Al-Shabaab uu gaari ay ka buuxaan walxaha qarxa geeyey Suuqa Kaawo Goday ee Degmada Wadajir ka dibna uu ku qarxiyey dadkii shacabka ahaa ee ka adeegaanaayey Suuqa, taariikhdu markay ahayd **26/11/2018** qaraxaasoo ay ku geeriyooden in ka badan 12 ruux oo ay ka mid ahaayeen:-

1. **Marxuum Dhamme Max'ed Muxudiin Max'ud (Aboorayste**
2. **Marxuumad Xaawo Xasan Max'ud**
3. **Marxuum C/risaaq Maxamed Xasan**
4. **Marxuum Axmed Xasan Xiirane**
5. **Marxuum Max'ed Aadan Diiriye**
6. **Marxuum Sh. Xasan Max'ed Xasan**

Kuna dhaawacmeen 7 ruux oo ay ka mid ahaayeen:-

1. Saynab Cabbdow Max'uud
2. Suuleey Max'ud Qaasim
3. Cabdi C/laahi Ratiile

Qodobka 2aad


Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si degdeg ah u faliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqangelayaa Xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

MUQDISHO: 19/10/2022

Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**



OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Faqradda 1^{aad} Xarfaha 'A' , 'B', iyo 'C' ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 10^{aad} ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobbada kala ah 434^{aad} XCS iyo 19^{aad} XCCQS.

MARKUU ARKAY: Warqadda sumaddeedu tahay Lr/XG/CQS/511/2022 ee Codsiga Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka sida ee soo baxday 15/10/2022.

MARKUU TIXGELIYAY: inay waajib tahay badbaadinta nafta muwaadaniinta Soomaaliyeed.

Wuxuu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo xeerkan, waxa uu si rasmi ah u oggolaaday in lagu fuliyo xukun dil toogasho ah gacan ku dhiigleyaasha:-

1. Shabaab **Shuceyb C/laahi Max'ed Axmed** 25 jir ah, ina Wiilo Axmed Max'ed ku dhashay Diinsoor wuxuu dil bareer ah u geystay Marxuumiinta kala ah:-
 - a) 28/06/2017 **Marxuum S/x/le X. Xuseen Macallin Jilacow**
 - b) 09/12/2017 **Marxuum G/le Bol. Yuusuf C/laahi Max'ud**
 - c) 05/05/2018 **Marxuum L/x/le Bol. C/laahi Ibraahim Xasan (Gambar)**
 - d) 27/11/2018 **Marxuum Cabdi Cali Max'ud**

Qodobka 2aad


Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka Sida la farayaa inay si degdeg ah u faliso dilkan toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqangelayaa Xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabaci doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

MUQDISHO: 19/10/2022

Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**



**MAGACAABIS LA TALIYE SARE MADAXWEYNE EE
DIMOQRAADIYAYNTA IYO DAWLAD WANAAGGA**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha loo magacaabay xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista magacaabis La Taliye Sare Madaxweyne Ee Dimoqraadiyaynta Iyo Dawlad Wanaagga

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}


Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkaan, waxaa uu u magacaabay **Mudane Prof. Abdirisak Osman Hassan (Jurile)** in uu noqdo magacaabis la taliye sare madaxweyne ee dimoqraadiyaynta iyo dawlad wanaagga.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo Saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 26/10/2022

Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**



DIB U HABAYN GOLAHA DHAQAALAHA QARANKA (GDQ)

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Farqadda 1^{aad}, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2^{aad} ee Dastuurka KMG.

MARKA UU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la sameeyo dib u habayn Golaha Dhaqaalaha Qaranka si loo waafajiyo arrimaha mudnaanta leh ee horumarinta dhaqaalaha dalka.

Madaxweynuhu wuxuu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkaan, waxaa dib u habayn lagu sameeyay **Golaha Dhaqaalaha Qaranka (GDQ).**

Qodobka 2^{aad}

1. Golaha Dhaqaalaha Qaranka waxaa Guddoomiye u ah Madaxweynaha J.F.S. halka Ra'iisul Wasaaruhuna yahay ku xigeenka guddoomiyaha Golaha Dhaqaalaha Qaranka.
2. Golaha waxa uu ka kooban yahay labo heer oo kala ah:
 - a. Heerka Jaangoynta Siyaasadaha iyo Go'aamada Dhaqaale ee Masiiriga ah.
 - b. Heerka La-Taliyayaasha iyo Xog-haynta (Secretariat).
3. Heerka Jaangoynta Siyaasadda iyo Go'aamada Dhaqaale ee Masiiriga ah waxaa xubno ka ah:

Madaxweynaha J.F.S, Ra'iisul Wasaaraha, Guddi-hoosaadka Dhaqaalaha ee Golaha Wasiirrada, Guddoomiyaha Bangiga Dhexe iyo Madaxda Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda

Federaalka marka loo baahdo go'aan ka gaarista qodobbo saamaynaya.

4. Heerka La Taliyayaasha iyo khubarada farsamo waxa ay ka kooban yihiin 9 xubnood oo La-taliyayaal ah, oo lagu soo xulayo aqoontooda iyo Secretariet-ka, oo labaduba hoos imaanayaan Xafiiska Madaxweynaha.
5. Heerka la-taliyayaasha iyo xoghaynta waxaa agaasime u ah La-taliyaha Sare ee Dhaqaalaha Madaxweynaha, kaa soo mas'uul ka ah isku-duwidda talooyinka heerkan ee Golaha.

Qodobka 3^{aad}


Xeerkani waxaa uu baabi'inayaa wixii xeer ah ee ka horeeyay, kana hor imaanaya.

Qodobka 4^{aad}

Xeerkan waxaa uu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.F.S waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 06/11/2022

Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**



**XILKA QAADIS IYO MAGACAABIS XUBNAHA GOLAHA
DHAQAALAHA QARANKA (GDQ)**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeer Madaxweyne Lr. 109, Taariikh 09 Ogoosto
2018, MAGACAABIS XUBNAHA GOLAHA
DHAQAALAHA QARANKA.

MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin
Mudanayaasha iyo Marwooyinka loo magacaabay xilalakan

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo Xubnaha Golaha
Dhaqaalaha Qaranka si loo xoojiyo kaalinta Golaha iyo
horutabinna loogu yeelo arimaha mudnaanta leh ee
horumarinta dhaqaalaha dalka

Madaxweynuhu wuxuu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkaan, waxaa uu
Madaxweynuhu kala diray Xubnihii hore ee Golaha Dhaqaalaha
Qaranka.

Qodobka 2^{aad}

Waxaa uu Madaxweynuhu u magacaabay mudanayaasha iyo marwooyinka magacyadoodu hoos ku xusan xubnaha Golaha Dhaqaalaha Qaranka ee heerka la-talinta iyo xoghaynta:


1. Dr. XAsan Aadan Hoosow - La-taliyaha Sare ee Dhaqaalaha Madaxweynaha, ahna Agaasimaha
2. Dr. Kamaaludiin Axmed Sheekh - Xubin
3. Adam Xuseen Rooble - Xubin
4. Nimco Maxamuud Sakal - Xubin
5. Dr. Cabdullaahi Cali - Xubin
6. Maluuka Dheere Sheekh Cabdulqadir - Xubin
7. Dr. Mahad Maxamed Sheekh Xasan - Xubin
8. Dr. Maxamed Cusmaan Maxamuud - Xubin
9. Dr. Cabdisalaam Cabdiraxmaan Maxamed - Xubin

Qodobka 3^{aad}

Xeerkan waxaa uu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.F.S waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 06/11/2022

Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**



**BURIN XEERARKA MADAXWEYNE EE KALA AH 40, 41 IYO 42,
KUWAAS OO AAN WAAFAQSANAYN DASTUURKA KMG AH IYO
KALA DIRIDDA GUDDIYADA SIDA AAN DASTUURKA
WAAFAQSANEYN LOOGU HOWLGELIYAY**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Xeer Madaxweyne Lr. 40 ee ku taariikhaysan 31/12/2020, kaas oo loogu ogolaaday Sharciga Wax-Ka-Beddelidda Qodobka 9^{aad} ee Sharciga Lagu Dhisay Guddiga Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka.

MARKUU ARKAY: Xeer Madaxweyne Lr. 42 ee ku taariikhaysan 31/12/2020, kaas oo loogu ogolaaday Sharciga Wax-Ka-Beddelidda Qodobka 10^{aad} ee Sharciga Lagu Dhisay Guddiga Madaxa-Bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka.

MARKUU ARKAY: Qoraalka sumadiisu tahay **X/G/504/B-12/021** ee ka soo baxay Aqalka Sare laguna sheegay in ay Dastuurka KMG khilaafsan yihiin:

- a. Ansixinta Madaxweynaha ee Wax-ka-Bedelidda Qodobka 9^{aad} ee Sharciga Lagu Dhisay Guddiga Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka;
- b. Ansixinta Madaxweynaha ee Wax-ka-Bedelidda Qodobka 10^{aad} ee Sharciga Lagu Dhisay Guddiga Madaxa-Bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka;
- c. Ansixinta Sharciga Hey'adaha Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliya

MARKUU ARKAY: Qodobka 4^{aad} , Faqraddiisa 1^{aad} Dastuurka KMG ee J.F.S.;

MARKUU ARKAY: Qodobada kala ah 71^{aad} (b), 82^{aad} (2), 111E, 111G iyo 112^{aad} ee Dastuurka KMG ee J.F.S, Qodobka 9^{aad} ee Sharciga Lagu Dhisay Guddiga Madaxa-Bannaan Doorashooyinka Qaranka Faqraddiisa 1^{aad} oo mudadda xil-haynta Guddida ku soo koobtay Lix sanadood oo aan la cusboonaysiin karaynin iyo Qodobka 10^{aad} ee Sharciga Lagu Dhisay Gudidda Madaxa-Bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka.

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad} ee Dastuurka KMG ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaliya oo ku waajibinaya ilaalinta iyo horumarinta mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka KMG Dalka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}

Waxaa la buriyay xeerarka Madaxweyne ee sida Dastuurka khilaafsan u soo baxay ee kala ah;

- a. Xeer Madaxweyne Lr. 40 ee ku taariikhaysan 31/12/2020, kuna saabsan Ansixinta Sharciga Wax-Ka-Beddelidda Qodobka 9^{aad} ee Sharciga Lagu Dhisay Guddiga Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka.
- b. Xeer Madaxweyne Lr. 41 ee ku taariikhaysan 31/12/2020, kuna saabsan Ansixinta Sharciga Hey'ada Diiwaan-Gelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliya.

- c. Xeer Madaxweyne Lr. 42 ee ku taariikhaysan 31/12/2020, Ansixinta Sharciga Wax-Ka-Beddelidda Qodobka 10^{aad} ee Sharciga Lagu Dhisay Guddiga Madaxa-Bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka.

Qodobka 2^{aad}

Waxaa la kala diray xubnaha Guddiyada aan loo howl galin si waafaqsan Dastuurka Dalka ee kala ah;

- Xubnaha Guddida Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee muddo xileedkoodu dhamaaday.
- Xubnaha Guddida Madaxa-Bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka.
- Waxaa la baabi'iyay dhamaan go'aamadii ay gaadheen mudadii ka danbeysay mudo 31.12.2020.

Qodobka 3^{aad}


Waxaa la farayaa Xukuumadda Federaalka Soomaaliya in ay u soo dhisto Xubnaha Guddida Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Xubnaha Guddida Madaxa-Bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka si waafaqsan Qodobka 112^{aad} ee Dastuurka KMG iyo shuruucda lagu dhisay.

Qodobka 3^{aad}

Waxa uu Xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO: 21/11/2022

Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**



**XILKA QAADIS IYO MAGACAABIS XUBNAHA
GUDDOOMIYE KU-XIGEENNADA GOBALKA BANAADIR**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Faqradda 1^{aad}, Xarafka 'C' iyo
Faqradda 2^{aad} ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90^{aad}, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 8^{aad}, Faqradda 4^{aad} ee Xeer Lr. 6 ee soo
baxay 12/02/1980 kuna saabsan in G/Banaadir iyo
Dowladda Hoose ay hoos yimaadaan
Madaxtooyada J.F.S.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha,
Federaalka iyo Dib-u-Heshiisiinta Tixraaceeduna
yahay **WAGF&D/XW/097/2022**, kuna saabsan soo
jeedin magacaabis Guddoomiye-Ku-Xigeennada &
Xog-Hayaha Guud ee Gobolka Banaadir

MARKUU ARKAY: in ay jirto baahi loo qabo in loo magacaabo
G/Banaair Guddoomiye Ku-Xigeenno & Xog-Haye
Guud.

MARKUU TIXGELIYAY: Waayo-aragnimada ay mudanayaashu u
leeyihiin xilka loo magacaabay.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkaan, waxaa mudanayaasha magacyadooda hoos ku xusan yihiin loo magacaabay xilalka ku hor qoran

Lr.	Magaca	Xilka
1.	Ciise Maxamuud Guure	Guddoomiye-Ku-Xigeenka Arrimaha Maamulka iyo Maaliyadda
2.	C/Casiis Cismaan Maxamed	Guddoomiye Ku-Xigeenka Arrimaha Bulshada
3.	Xasan Maxamed Jimcaale	Guddoomiye Ku-Xigeenka Howlaha Guud
4.	Maxamed Axmed Diiriye (Yabooh)	Guddoomiye Ku-Xigeenka Arrimaha Siyaasadda iyo amniga
5.	Faysal Carraale Afrax	Xog-hayaha Guud

Qodobka 2^{aad}


Waxaa Xilalka laga qaaday mas'uuliyiintii horey u heeysay xilalka sare ku xusan.

Qodobka 3^{aad}

Waxa uu Xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

MUQDISHO: 17/11/2022

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**



MAGACAABIS GUDDOOMIYE-KU-XIGEENKA BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Faqradda 1^{aad}, Xarafka ‘C’ iyo Faqradda 2^{aad} ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90^{aad}, Xarafka ‘K’ ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Madaxweyne Lr. 130 ee soo baxay 22/04/2012, kuna saabsan Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo Hey’adaha Maaliyadda Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Go’aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.11.11.22** ee soo baxay **24/11/2022**, kuna saabsan ansixinta “**In loo magacaabo Mudane Dr. Cali Yaasiin Sh. Cali – Guddoomiye Ku-Xigeenka Bankiga Dhexe ee Soomaaliya**” oo uu goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S ee warqadda summadeedu tahay **XRW/0068/11/2022** ee soo baxay **24/11/2022**, kuna saabsan Go’aan Gole-Ansaxinta So Jeedinta Magacaabid Guddoomiye Ku-Xigeenka Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabay xilkan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}


Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkaan, waxaa **Mudane Dr. Cali Yaasiin Sh. Cali** loo magacaabay in uu noqdo Guddoomiye Ku-Xigeenka Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

Qodobka 2^{aad}

Waxa uu Xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 27/11/2022

Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**



**APPOINTMENT OF PRESIDENTIAL ADVISOR ON NATIONAL
MARITIME COORDINATION AND BLUE ECONOMY**

THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Having seen: Article 87th of the provisional constitution of the Federal Republic of Somalia

Having seen: Article 90th of the provisional constitution of the Federal Republic of Somalia

Having seen: The qualifications and experience the official posses for the post.

Having considered: The need to appoint Presidential appointment of Presidential Advisor on National Maritime Coordination and Blue Economy

DECREES THE FOLLOWING:

Article One


By the time the President of the F.G.S signs this decree, the President has appointed **Muntaziyah Mohamed Jimale** as an **Advisor on National Maritime Coordination and Blue Economy**.

Article Two

This decree shall come into force and effective once the President of the F.R.S signs it and it will be published in the Official Bulletin of the Federal Republic of Somalia.

Mogadishu: 29/11/2022

Hassan Sheikh Mohamud
President of the Federal Republic of Somalia



**LA-TALIYE SARE AHNA, ERGAYGA GAARKA AH EE XAFIISKA
MADAXWEYNAHA U QAABILSAN DHAMAYSTIRKA ARRIMAHA
DASTUURKA, GARSOORKA IYO ISKAASHIGA LABADA DAL EE
TALYAANIGA IYO SOOMAALIYA**

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Faqradda 1^{aad}, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2^{aad} ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90^{aad}, ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabay xilkan.

MARKUU TIXGELIYAY: Muhiimada ay leedahay xoojinta xiriirka taariikhiga ah ee u dhexeeya labada dal;

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo meelmarinta Siyaasadda cusub ee ku saleysan dhisidda iyo horumarinta Garsoor xaq ku saleysan oo ay howl wadeenno ka yihiin aqoonyahannada sarsare ee labada dal iyo baahida loo qabo dhamaystirka Dastuurka dalka; Iskaashiga Amniga labada Dal.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista la-taliye sare ahna, ergayga gaarka ah ee Madaxweynaha J.F.S u xil saaran horumarinta Arrimaha sare ku xusan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}


Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Xeerkaan, waxaa uu u magacaabay **Prof. Avv. Cali Abuukar Xaayow “Cali Marduuf”** in uu noqdo La-Taliye sare ahna, Ergayga Gaarka ah ee Xafiiska Madaxweynaha J.F.S u Qaabilsan Dhamaystirka Arrimaha Dastuurka, Garsoorka iyo Iskaashiga labada Dal ee Talyaaniga iyo Soomaaliya

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo Saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 04/09/2022

Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya



Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Go'aan Maamul

Magacaabista Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare ee

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Muqdisho,

11^{ka} Diseembar 2022

GUDOOMIYAHA GOLAHA AQALKA SARE

MARKUU ARKAY:

Soo-jeedinta Senatorrada Golaha Aqalka sare ee ku aadan in Agaasime Cabdinaasir Ibraahim Guuleed loo magacaabo Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare soo jeedintaasi oo aan qabtay **10/12/2022** iyada oo ay ku saxiixan yihiin soddon iyo saddex senator.

MARKUU ARKAY:

Taariikh nololeedka iyo shahaadooyinka agaasimaha

MARKUU ARKAY:

Muddadii uu Aqalka Sare ka hawlgalayay isaga oo muujiyay howlkarnimo iyo xil-gudasho ku dhisan xirfad iyo aqoon.

MARKUU ARKAY:

Qod. 96^{aad} (1) ee xeer hoosaadka Golaha Aqalka sare.

MARKUU ARKAY:

Qod. 7^{aad} (1) ee xeer hoosaadka Golaha Aqalka sare.

MARKUU LA TASHADAY:

Labada Guddoomiye Ku-Xigeen ee Golaha Aqalka Sare

Wuxuu Guddoonsaday Qodobada soo socdo:

Qodobka 1^{aad}

Dallacsiin Agaasime iyo Magacaabista Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu u dallacsiiyay una magacaabay **Agaasime Cabdinaasir Ibraahim Guuleed Xilka Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare.**

Qodobka 2^{aad}

Muddada Xil-heynta Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare

Xilka Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare waa mid joogto ah waxaana xilka looga qaadi karaa ama lagu beddeli karaa oo kaliya si waafaqsan nidaamka shaqaalaha Aqalka Sare iyo shuruucda kale ee Dalka.

Qodobka 3^{aad}

Dhaqangelidda Go'aankan

Go'aankan wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare laguna shabbadeeyo shaabadda Golaha Aqalka Sare.



Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Ujeedo: Wareegto “Xeer-Wasiir” ee looga hawlgalinayo Dekadaha dalka “ Wakaaladda Soo bixinta, Dhoofinta, Tirinta iyo Sahayda Maraakiibta”

Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda X.F.S

MARKUU ARKAY: Xeerkaa lagu dhisay Wakaaladdan ee Sharci Lr. 17, 16 Maarso 1978 ee ku soo baxay Xeer-Madaxweyne iyo Buugga Faafinta Rasmiga.

MARKUU ARKAY: Go’aankii dib loogu hawlgaliyay Wakaaladdan, ayadoo 18/02/2016 lala meelmariyey Ururka Iskaashatooyinka Dalka oo ay ka qaadan jirtay alaabaha Sahayda Maraakiibta (qudaarta, kaluunka, hilibka, ... iwm, iyo sidoo kale calafka/cowska xoolaha ka dhoofaya dalka), ayadoo wakaaladdan oo ku dhisan nidaamka (Public Private Partnership-ka) ay Go’aan kula shaqeeyn doonto Wasaaradda Dekadaha iyo Iskaashatooyinka dalka.

MARKUU ARKAY: Xeerka Hawlgelinta ee Wakaaladdan ee lagu soo saaray Buugga Faafinta Rasmiga ee Dawladda 10 Juun 2017.

MARKUU ARKAY: Go’aanka Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda in Wakaaladda lagu wareejiyo Qeyb Xafiiskii ay ku shaqeeyn jirtay, si ay usoo celiso adeegyadii Soo-bixinta, Dhoofinta, Tirinta Alaabta & Sahayda Maraakiibta.

MARKUU ARKAY: Xeerka Cusub ee Wakaaladda ay ku shaqeyneyso, ee lagu saleeyey Sharcigii lagu dhisay Wakaaladdan ee ah Sharci Lr. 17, kaasoo qodobadiisa ugu muhiimsan kala yihiin:-

Qodobka 1aad, Farq. 2aad: Wakaaladdu waa mid madax-banaan, oo yeelanaysa jiritaan Shaqsiyad Sharciyeed.

Qodobka 4aad, Farq. 3aad: In ay soo-bixiso alaabaha kazoo degta Dakadaha ama Gagida Diyuuradaha dalka, ama ay ka dhoofiso cid kasta ha lahaatee.

Qodobka 4aad, Farq. 4aad: In ay tiriso alaabaha kasoo dagta Dekadaha & Gagida Dayuuradaha ama kuwa laga dhoofiyo dalka.

Qodobka 4aad, Farq. 1aad: In ay u iibiso Maraakiibta wax Alle waxii ay u baahan yihiin oo ay ka mid yihiin cuntada (kalluunka, hilibka, qudaarta, calafka xoolaha...) batroolka, biyaha, ... iwm

Qodobka 4aad, Farq. 5aad: Dhammaan hawlaha lagu soo sheegay qodobkan waxaa ka reeban in ay qabtaan cid kale oo aan aheyn Wakaaladdan loo xilsaaray ee lagu tilmaamay Qodobka **4aad**.

Qodobka 5aad: Wakaaladda waxay awood buuxda u leedahay in ay fuliso hawlaha loo xilsaaray ee lagu tilmaamay Qodobka **4aad**.


Qodobka 6aad: Kormeerka iyo ilaalinta guud ee Wakaaladda waxaa yeelanaya hadba **Hay'adaha Dawladda** ee ku shaqada leh, taasoo Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ayadoo Wakaaladda ay ku shaqeeynayso nidaamka Public-Private-Partnership-ka, ayaa Go'aankan Wasaaradda waxay ugu ogolaanaysaa Dekadaha dalka in Gaadiidka Wakaaladda ay soo gali karaan ayagoo u hogaansamaya awaamiirta Dekadaha Dalka.

Sidaas Awgeed, Wasiirka Wasaaradda markuu tixgeliyay Qodobadaa sare ku xusan ayaa manata oo taariikhdu tahay **15/09/2020** waxay Go'aan **XEER-Wasiir** ay Dekadaha dalka kaga hawlgalineysaa” **Wakaaladda Soo bixinta, Dhoofinta, Tirinta alaabta iyo Sahayda Maraakiibta**”, taasoo laga bilaabo maanta Wakaaladda ay si rasmi ah uga qabsan karto adeegyadeeda Dekadda Muqdisho iyo kuwo kale ee Dalka adeegyadeeda sare ku xusan, gaar ahaan **Qodobka 4aad, Farqada 5aad ee sharci Lr. 17**

Waxaa haddaba la farayaa Maareeyaha Wakaaladda **Dr. Yahie Yusuf Haji Ali** iyo Hawl-wadeenada in ay u hogaansamaan Sharuudaha u dagan Furdooyinka dalka.

Xeerkan wuxuu dhaqan-galayaa maanta marka uu saxiio **Wasiirka Wasaaradda Dakadaha iyo Gaadiidka Badda X.F.S.**

Wada-Shaqeyn Wacan


Xil. Maryan Aweys Jaama
Wasiirka Wasaaradda





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

SHARCI LR.001
ANSIXINTA SHARCIGA QOONDADA MIISAANIYADDA 2023-DA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

- MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Faqradda 1^{aad} iyo Faqradda 2^{aad} ee Dastuurka KMG.
- MARKUU ARKAY: Qodobka 90^{aad}, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
- MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka XGGSH/0151/B11/22, ku taariikheysan 31/12/2022, kuna saabsan Qaraarka Ansixinta Odooroska Miisaaniyadda 2023-da.
- MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:


Qodobka 1^{aad}

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Qoondada Miisaaniyadda 2023-da.

Qodobka 2^{aad}

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Muqdisho, 31 Diseembar 2022



Madaxweynaha J. F. S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

TIRSI 0021

HALKU-DHIGGA SANNADKAN 2023-KA

“KU TIIRSANAANTA AWOODDEENA DAKHLI”

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

TUSMADA BUUGGA

1. CUTUBKA 1^{AAD} GUUD AHAAN.....	2
1.1 QODOBKA 1 ^{AAD}	2
1.2 QODOBKA 2 ^{AAD} EREYBIXIN.....	2
1.3 QODOBKA 3 ^{AAD} MIISAANIYADDA LA QOONDEEYAY.....	3
2 CUTUBKA 2^{AAD} MAAMULKA MIISAANIYADDA	3
2.1 QODOBKA 4 ^{AAD} AWOODAHA XAFIISYADA DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA	3
2.2 QODOBKA 5 ^{AAD} MIISAANIYAD WAREEJIN.....	3
2.3 QODOBKA 6 ^{AAD} MIISAANIYAD WAREEJIN XAFIISKA DHEXDIISA.....	4
2.4 QODOBKA 7 ^{AAD} MIISAANIYAD WAREEJINTA XAFIISYADA DHEXDOODA	4
2.5 QODOBKA 8 ^{AAD} WAREEJINTA MIISAANIYADDA KAYDKA.....	4
2.6 QODOBKA 9 ^{AAD} MIISAANIYADDA KABISTA	4
2.7 QODOBKA 10 ^{AAD} GASHIBAXA/QAAN BAX	4
2.8 QODOBKA 11 ^{AAD} QAAMAHA.....	5
2.9 QODOBKA 12 ^{AAD} ISTICMAALKA SDR EE WASAARADDA	5
3 CUTUBKA 3^{AAD} KHARASH BIXIN	6
3.1 QODOBKA 13 ^{AAD} MUDNAANTA KHARASH BIXINTA.....	6
3.2 QODOBKA 14 ^{AAD} DHITO.....	6
3.3 QODOBKA 15 ^{AAD} LACAGTA LAGA BIXIYO MIISAANIYADDA DUUDUUBKA	6
3.4 QODOBKA 16 ^{AAD} XADDIGA KHARASH BIXINTA	7
3.5 QODOBKA 17 ^{AAD} GEDAB	7
3.6 QODOBKA 18 ^{AAD} LACAG BIXINTA AGABKA IYO ADEEGGA	7
3.7 QODOBKA 19 ^{AAD} LACAGTA AAN LA ISTIC-MAALIN.....	8
3.8 QODOBKA 20 ^{AAD} DHICITAANKA QOONDOOYIKA DHAMAADKA SANAD XISAABEEDKA	8
3.9 QODOBKA 21 ^{AAD} WARBIXIN XISAABEEDKA.....	8
4 CUTUBKA 4^{AAD} QOONDAYNTA MIISAANIYADDA	10
4.1 QODOBKA 22 ^{AAD} QOONDAYNTA MIISAANIYADDA XAFIISYADA DOWLADDA.....	10
4.2 MUDDADA DHAQAN-GALKA.....	10
5 LIFAAQYADA MIISAANIYADDA SANADKA 2023-KA	11
5.1 SOO KOOBIDDA DAKHLIGA IYO KHARASHKA MIISAANIYADDA SANADKA 2023.....	11
5.2 FAAH-FAAHINTA DAKHLIGA GUUD DOWLADDA EE MIISAANIYADDA SANADKA 2023-KA.....	12
5.3 QOONDADA HAY'ADAHA EE MIISAANIYADDA SANADKA 2023-KA	14
5.4 SOO KOOBIDDA WADARTA GUUD EE KUTALGALKA MIISAANIYADDA SANADKA 2023-KA (US\$).....	16
5.5 FAAH-FAAHINTA KUTALAGALKA MIISAANIYADDA SANADKA 2023-KA EE HAY'ADAHA DOWLADDA	18
5.6 FAAH-FAAHINTA KUTALAGALKA MIISAANIYADDA MASHAARIICDA EE SANADKA 2023-KA	47

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

1. Cutubka 1^{aad}

Guud Ahaan

1.1 Qodobka 1^{aad}

Xeerkan waxaa lagu magacaabay “Xeerka Dhaqangelinta Miisaaniyadda sanadka 2023-ka ee tirsi 00021/2022”

1.2 Qodobka 2^{aad} Ereybixin

Haddii aan si kale loogu fasirin xeerkan dhexdiisa, ereyada soo socda waxay yeelanayaan macnaha mid walba ku hor qeexan: -

1. “Xariiqda-Sare” waxaa loola jeeda dhacdo maaliyadeedka saameynta ku leh hadhaaga lacagaha cadaanka ah”
2. “Qoondayn” waxaa loo la jeedaa amar kasta oo uu Labada Aqa lee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ku amrayo in lacag laga bixiyo Miisaaniyadda duduubka ah.
3. “Ansixin” waxaa loo la jeedaa ayidaadda uu ayido wasiirku, Miisaaniyadda ku diyaarsan walax kharasheedka qaab wafaqsan qoondo Miisaaniyadeedka uu Labada Aqa lee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Ansixiyey.
4. “Kharashka Mashaaricda” waxaa loo la jeedaa kharashka lagu bixiyo iibka iyo dayactirka hantida joogtada ah, oo ay ku jiraan kharashyada ay ka mid yihin kuwa tababarada iyo adeegyada latalinta.
5. “Gedab “waxaa loo la jeedaa waajibaadka noqonaya qaan hadiiba ama marka shuruudaha heshiis jiray ama sharci la fuliyo.
6. “Wasiir ama wasaarad” waxaa loo la jeedaa wasiirka maaliyadda ama wasaaradda maaliyadda hadba sida ay tahay.
7. “Xafiis dawladeed” waxaa loo la jeedaa xafiis kasta oo ka mid ah Dowladda Federalka Soomaaliya oo guud ahaan ama qayb-ahaan looga qoondeeyo miisaaniyadda Dowladda ee xeerkan lagu xeeriyay.
8. “Kala wareejin” waxaa loola jeedaa ogolaanshaha kala warejinta Miisaaniyadda la qoondeeyey, lagana wareejiyo cinwaan, farac cinwaan mashruuc ama walax kharasheed laguna wareejiyo mid kale.
9. “Qaansheegatada” waxaa loola jeedaa shirkadaha ama shaqsiyaadka hay’adaha dowladda siiya adeeg ama agab.
10. “Xariiqda-Hoose” waxaa loola jeedaa haraaga dib u bixinta qaamaha looma diiwaangaliyo dakhli ama kharash balse waxaa loo adeegsan karaa iyo lagu dheelitiro faraqa xisaabta dowladda, waxaana loo yaqaan dhacdo maaliyadeedka xariiqda-hoose, taa waxaa ka soo horjeeda Xariiqda-Sare taasoo loo adeegsado

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

dhacdooyinka maaliyadeed ee saameynta ku leh haraaga lacagta (Dakhli ama Kharash).

11. "SDR" waxaa loola jeedaa lacagta ay isticmaasho hay'adda lacagta aduunka (IMF) waxaana laga soo gaabiyey Special Drawing Rights.
12. "IMF" waxaa loola jeedaa Hay'adda Lacagta Aduunka, waxaana laga soo gaabiyey International Monetary Fund.
13. "SFMIS" waxaa laga soo gaabiyey Somali Financial Management Information System.

1.3 Qodobka 3^{aad} Miisaaniyadda La Qoondeeyey

Miisaaniyadda Dowladda Fedaraalka Soomaaliya ayaa si ay u meel-mariso hawlaha u qorshaysan Sanad misaaniyadeedka ka billaabma 1-da Janaayo 2023-ka kuna dhamaada 31, December 2023-ka, ayaa sida hoos ku xusan looga qoondeeyay dakhliga khasnadda iyo lacagaha kale ee Dowladda, sida lagu qeexay jadwalkan. Wadarta Miisaaniyadda ee loo qoondeeyey Miisaaniyadda Joogtada iyo tan Raasumaalka ah ayaa ah sidan hoos ku xusan: -

B) Kharashka Joogtada ah	US	480,448,293
T) Kharashka Raasumaalka ah	US\$	<u>496,768,246</u>
Wadarta Guud Ee Miisaaniyadda	US\$	977,216,539

2 Cutubka 2^{aad} Maamulka Miisaaniyadda

2.1 Qodobka 4^{aad} Awoodaha Xafiisyada Dowladda Federaalka Soomaaliya

1. Wasiirka maaliyadda waxaa loo Awood siiyay in uu fasaxo una qaybiyo dakhliga Dowladda Soomaaliya iyo lacagaha kaleba, cadadka halkan loogu qoondeeyay xafiisyadooda marka ay soo codsadaan mas'uuliyiinta xafiisyada Dowladda Federaalka Soomaaliya ee ay khusayso, si ay hawlahooda ugu fushadaan.
2. Xafiisyada Dowladda waxaa loo awood siiyay in ay diwaan-galiyaan ciwaanka Miisaaniyadda la qoondeeyey, farac ciwaanka, mashruuca ama barnaamijyada xafiisyada, kolba kuu yahay. Waana inuu talaabada lagama-maarmaanka ah ka qaataa adeegsiga deynta ama deeq kasta oo dheerada, haday tahay mood ama lacag oo laga helo illaha gudaha ama dibadda looguna talagalay fulinta miisaaniyadda mashariicda ama miisaaniyadda joogtada ah. Sidoo kale, waxa lagama maarmaan ah in bil ka hor dhammaadka sannad miisaaniyadeedka loo gudbiyo warbixin Wasaaradda.

2.2 Qodobka 5^{aad} Miisaaniyad Wareejin

1. Miisaaniyadda Joogtada ah waxaa loo wareejin karaa Misaaniyadda Mashaariicda.
2. Miisaaniyadda Mashaariicada looma wareejin karo Miisaaniyadda Joogtada ah.

2.3 Qodobka 6^{aad} Miisaaniyad Wareejin Xafiiska Dhexdiisa

1. Wasiirku wuxuu xafiis dhexdiis: -

B. Kala wareejin karaa kharashka Miisaaniyadda joogtada ah walax walax haddii ay isku madax yihiin

T. Ka wareejin karaa Miisaaniyadda mashruuc kuna wareejin karaa mashruuc kale.

2. Wasiirku wuxuu u xilsaari karaa mas'uulka xafiiska Dowladda ee ku habboon oo ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda in uu meel-mariyo ama fuliyo xilka iyo Awoodda lagu siiyay faqradda 1^{aad} ee qodobkan.

2.4 Qodobka 7^{aad} Miisaaniyad Wareejinta Xafiisyada Dhexdooda

1. Wasiirku wuxuu wareejin karaa Miisaaniyadda joogtada ah ee loo qoondeeyay xafiis dawladeed in loo wareejiyo xafiis kale, kadib marka la xaqiijiyo in xafiiska loo qoondeeyay Miisaaniyadda aanu wada istic-maali karaynin Miisaaniyadaas si waafaqsan Qodobka 33(2) ee sharciga maareynta Maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.

2. Wasiirku wuxuu amri karaa in Miisaaniyadda Mashaariicda ee loo qoondeeyay xafiis, loo wareejiyo mashruuc xafiis kale. Kadib marka la xaqiijiyo in Miisaaniyad yaraanta xafiiska laga dabooli karo miisaaniyad mashaariic oo loo ansixiyey sanadkaas xafiis kale oo dawladeed si waafaqsan Qodobka 33(2) ee sharciga maareynta Maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.

2.5 Qodobka 8^{aad} Wareejinta Miisaaniyadda Kaydka

1. Wasiirku wuxuu amri karaa in Miisaaniyadda kaydka loo wareejiyo loona istic-maalo kharash deg-dega ah kadib marka ay dhacaan hawlo gurmada deg-deg ah, oo uu baahan kharash deg-deg ah, oo aan baahidoodu horay u muuqanin wakhtiga la diyaarinayay Miisaaniyadda sanadka. Kolka uu wasiirka ansixiyo soo wareejinta kharashka kaydka kabidda waxaa lagu wareejinayaa hay'adda ka mas'uulka ah. Wasiirka ayaa si joogta ah u siin doona Labada Aqa lee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya warbixin ku aadan kharashka laga wareejiyey kaydka kabidda.

2.6 Qodobka 9^{aad} Miisaaniyadda Kabista

Labada Aqa lee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayagoo ka duulaya tala bixinta golaha fulinta ayuu meel mariyaa Miisaaniyadda kabista ah.

2.7 Qodobka 10^{aad} Gashibaxa/Qaan Bax

Gashibaxa iyo Amaahda sharcieysan ee laga dhaxlay Miisaaniyadda 2022-ka ayaa noqoneysa gashibax u gudbeysa Miisaaniyadda sanadka 2023-ka, waxayna noqoneysaa qeyb ka mid ah mudnaanta kharashka, Wasiirka ayaa u xilsaaran xaqiijinta dhamaan qaamaha iyo gashibaxa kuwooda sharciga ku qotoma iyo kuwa hareer marsan.

2.8 Qodobka 11^{aad} Qaamaha

1. Wasiirka oo kaliya ayaa awood u leh amaahda Gudaha iyo dibadda lagu qaadayo magaca dowladda federaalka ah asagoo raacaya habraacyada iyo shuruudaha lagu qeexay qodobka 35^{aad} iyo 36^{aad} ee sharciga maareynta maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.
2. Dowladda Federaalka Soomaaliya ma gali karto wax qaan ah gudaha ama dibadda marka laga reebo wadiiqadaha SDR (Special Drawing Rights) ee Hay'adda Lacagta Aduunka "IMF" lagula jiro iyo lacago horumaris yar yar eel aga amaahdo banka dhexe ee soomaaliya ayna tahay in lagu bixiyo isla sanad Miisaaniyadeedka gudihisa.
3. Dhaqaalaha ka yimaada deymaha waxaa lagu diiwaangalinayaa xariiqda-hoose ee xisaabaadka (Below-the-line transactions), dhaqaalaha noocaas ah looma aqoonsan doono dakhli ama Kharash.
4. Bixinta dulsaarka deymaha waxaa lagu diiwaan galin doonaa xariiqda-sare xisaabaadka (above the line transactions) qaab Kharash ah.

2.9 Qodobka 12^{aad} Isticmaalka SDR Ee Wasaaradda

1. Si waafaqsan Qodobka 8^{aad} iyo faqradiisa 3^{aad} ee sharciga maareynta maaliyadda, Wasiirka ayaa mas'uul ka ah maamulka, hantida iyo qaamaha la xidhiidha isticmaalka lacagta SDR (special Drawing Rights).
2. Si looga fogaado hubanti la'aan waxaa halkan lagu qeexayaa: -
 - a) Hantida iyo qaamaha la xidhiidha lacagta SDR ee Wasaaradda waxaa iska leh Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya mana noqon karto qeyb ka mid ah hantida ama qaamaha Banka Dhexe Ee Soomaaliya;
 - b) Qaanta dulsaarka ee ku waajibtay qoondada Wasaaradda waxaa lagu leeyahay dowladda federaalka ah Soomaaliya, lagumana dalacayo SDR uu hayo Banka dhexe ee Soomaaliya
3. Wasiirka waxa uu u isticmaali karaa lacagta SDR ee Wasaaradda kaliya kharashaadka mudnaanta lagu siiyey Qodobka 13^{aad} faqradiisa 1^{aad} marka ay timaado hoos u dhac dakhli;
4. Haraaga lacagta SDR ee Wasaaradda la siiyey kama yaraan karto 3 malyan ee unit-ka SDR.
5. Wasiirka wuxuu ka habeynayaa dulsaarka qoondada haraaga Wasaaradda ee SDR-ka marka loo baahdo in la maareeyo cadadka kor lagu xusan faqrada 4^{aad} ee Qodobkan.
6. Waa in lagu lifaaqaa xisaab xirka sanadlaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya lifaaq sharaxaya haraaga taagan ee lacagta SDR-ka iyo qoondada u harsan Wasaaradda iyo isbadal kasta oo dhaca inta lagu guda jiro sanad maaliyadeedka.

3 Cutubka 3^{aad} Kharash Bixin

3.1 Qodobka 13^{aad} Mudnaanta Kharash Bixinta

Haddii ay timaado hoos u dhac dhanka dakhliga ama deeqaha wasaaraduna fulin weyso dhamaan kharashaadkii loogu talagalay Miisaaniyadda sanadka 2023-ka, waxaa mudnaanta bixinta kharashka loo raacayaa sida ay u kala horreyaan ee hoos taxan.

1. Raashinka iyo Gunnooyinka Ciidamada qalabka sida;
2. Khidmadaha Maaliyaddu ku shaqeyso (Khidmadda Banka, Dulsaarka iyo Qaamaha);
3. Mushaaroyinka/gunnooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda;
4. Gunnada Xildhibaanada Labada Aqal ee BJFS iyo G/Wasiirada;
5. Mushaharka iyo gunnooyinka Gashibaxa ku jira ee kasoo wareegay miisaaniyada sanadkii hore ee 2022;
6. Adeegga iyo Agabka Xafiisyada Dowladda federaalka iyo Dowlad Goboleedyada;
7. Gashibaxa Alaabta iyo Qaamaha la hormarsaday

3.2 Qodobka 14^{aad} Dhito

1. Dhakhliga iyo Deeqaah Dowladda Federalka Soomaaliya hesho waa in la dhigaa Khasnadda Dhexe ee Dowladda Soomaaliya 24 saacadood gudahooda oo ka bilaabanaysa marka la qabtay, haddii aysan ku soo aadin maalin aan la shaqaynaynin oo leh tixgelinteeda waqti.
2. Bangiga dhexe ee Soomaaliya waa in uu aqbalaa qabashada dakhliga dawladda, islamarkaana uu meel-mariyo kharash bixinta isagoo isticmaalaya xisaabta Dowladda Federalka ah ee bankiga ka furan.

3.3 Qodobka 15^{aad} Lacagta Laga Bixiyo Miisaaniyadda Duuduubka

1. Iyada oo aanu Labada Aqa lee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ogolaan, wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda duuduubka ah.
2. Lagama gali karo kharash ama gedab Miisaaniyadda la ansixiyey, ka hor inta aanu ogolaan ama qoondayn wasiirku.
3. Dhamaan bixinta qorsheysan waa in ay si toos ah oga baxdaa khasnadda dhexe una aadaa qaansheegatada ayadoo mareyn hay'adaha adeegga ama agabka la siiyey.
4. Dhamaan qabashada iyo bixinta lacageed ee miisaaniyadda waa in ay martaa hab-xisaabeedka dowladda (SFMIS) si elektroonik ah, ka dibna la waafajiyaa warbixin xisaabeedka Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

5. Dhamaan bixinta qaansheegtada iyo qandarasleyaasha waa in ay martaa barnaamij xisaabeedka dowladda (SFMIS), lagana bixiyaa madax iyo madax-xigeenada ku haboon ee khasnadda dhexe ee dawladda si toos ah uu u qaato qofka iyo shirkadda qaansheegtada ah.
6. Haddii hay'ad loo sameeyo hormaris lacageed sababo la xidhiidha kharash maamul, horumariska waxaa loo diiwaangalinayaa sida hanti la bixiyey, ka dibna waa in la kharash gareeyo. Lama fasixi karo hormaris kale ayadoo la kharash gareyn kii hore.
7. Si loo kharash gareeyo hormariska lacageed ee taagan dhamaan hay'adaha dowladda waa in ay u keenaan Wasaaradda xogaha iyo xaashiyaha biilasha iyadoo la socoto dalab kharash gareyn si kharash kasta loogu diiwaangaliyo madax xigaha ku haboon.

3.4 Qodobka 16^{aad} Xaddiga Kharash Bixinta

1. Marka laga reebo sida ku xusan qodobada 5^{aad} ilaa 8^{aad}, ma jirto hay'ad kharash gareyn karta sanadka gudahiisa, qoondada loogu qoondeeyey xeerkan ee sanadka.
2. Wasiirka ayaa qeexi doona lacagaha gacan ku haynta ah, hadhaaga xisaab kasta waxay ku jaango'naan doonta xadiga Wasiirka jaangooyo.

3.5 Qodobka 17^{aad} Gedab

1. Wax gedab ah lagama gali karo qoondaha, kaliya inuu soo codsado Mas'uulka xafiiska Dowladda ama cid uu qoraal ku wakiishay kaliya.
2. Madax kasta oo xafiis dawladeed magali karo heeshiis ama nidaam kale oo uu baahan kharash, kaliya marka ay jirto hadhaa aan qaan ahayn oo ku filan in ay daboosho deynta lagali doono sanad miisaaniyadeedka 2023.
3. Wasaaraddu waxay aasaasi doontaa habraaca la raaco iyo hab diwaaneed qoraya dabagalka gedebka maaliyadeed ee walax miisaaniyadeed kasta.
4. Madaxa xafiiska dawladdu wuxuu yeellan doonaa diiwaanno lagu hubiyo gedabyada maaliyadeed ee walax kharasheed kasta habka uu u xeeriyey wasiirku.

3.6 Qodobka 18^{aad} Lacag Bixinta Agabka iyo Adeegga

1. Ka sokow foojarada kale ama cadaymaha loo bahan yahay, Xafiis kasta oo dawladeed ma bixin karo lacag illaa uu xaqijiyo ama hubiyo madaxa xafiisku ama cidda kale ee uu madaxa xafiisku u xil saaray.

B. Marka lacag bixintu tahay mid la xidhiidha hawl u baahan in la qabto, Allaab keenid ama addeeg waa in ay.

- I. Waa in ay tahay shaqada laqabtay, allaabta la keenay ama adeegga la bixiyay & qiimaha la saaray mid waafaqsan heeshiiska ama haddii ayna heshiiska ku caddayn noqdaa mid macquul ah.

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

II. Waa in ay noqoto mid-waafaqsan shuruudaha heeshiiska kharash bixintu, ka hor inta aan la dhammaystirin shaqada, aan la soo xarayn allaabta ama la helin adeegga

III. Waa in ay ahaato kharash bixinta mashaariicdu mid waafaqsan nidaamka iyo awaamiirta u deggan Wasaaradda, islamarkaana mac-quul ah oo sugan: Ama

T. Lacagta kharash kasta oo kale waa in ay ahaato mid uu lacag-qaatuhu xaq u-leeyahay, qaadashada lacagta uu qaatay.

2. Wasaaraddu waxay soo saari kartaa nidaam lagu xaqiijinayo ama hubbinayo xaqiiqda cadaymaha uu u baahan yahay qodobkani.
3. Xafiisyada Dawladdu waxay yeelan doonaan sanduuq ay ku kayd sadaan lacagta hawl fulinta cadadka yar, cadadka lacageed ee loo istic-maali doono hawl-fulin waxaa go'aamin doona wasiirka.

3.7 Qodobka 19^{aad} Lacagta aan la Istic-maalin

1. Iyadoo lagu xeerin doono wareegtooyin ay wasaaraddu soo saarto ayaa waxaa lagu celin khasnada dhexe hadhaaga Miisaaniyadda la qoondeeyey ee sanad Miisaaniyadeedku ka dhacay, aan la istic-maalina. Waxaana lagu kordhinayaa sanduuqa qasnada dhexe ee wasaaradda.

3.8 Qodobka 20^{aad} Dhacistaanka Qoondooyika Dhamaadka Sanad Xisaabeedka

1. Dhamaan qoondoonyinka aan la isticmaalin iyo kuwa aan la gadbin ee Miisaaniyadda la qoondeeyey waa dhacayaan dhamaadka sanad maaliyadeedka si waafaqsan qodobka 34(1) ee sharciga maareynta maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.
2. Dhamaan lacagaha aan la bixin ee laga gadbay Miisaaniyadda la qoondeeyey aanse la bixin ka hor dhamaadka sanad maaliyadeedka waxaa loo diyaarinayaa in lagu bixiyo muddo aan ka badneyn 30 cisho laga soo bilaabo dhamaadka sanadka tagay, haddaba, tani waxay ku xidhnaan doonta awoodda dakhli iyo ogolaanshaha Xisaabiyaha Guud si waafaqsan qodobka 34(2) ee sharciga maareynta maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.
3. Diiwaangalinta, xisaabinta iyo warbixinada lacagaha aan la bixin waxaa lagu qeexi doonaa habraac lagu soo saarayo wareegtada dhaqagalinta Miisaaniyadda, wax gadeb ah lama gali karo wixii ka danbeeya 10th December si waafaqsan qodobka 34(3) ee sharciga maareynta maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.

3.9 Qodobka 21^{aad} Warbixin Xisaabeedka

1. Dhamaan Hay'adaha Dowladda waa in ay u keenaan Xisaabiyaha Guud iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda dhamaan xisaab xidhka kharajka iyo dakhliga ee bishaas ugu danbeyn 7da bisha xigta iyadoo la raacayo qaabka uu tilmaami doono

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

Xisaabiyaha Guud. Waxaa awood loo siiyey Wasaaradda inay hakiso bixinta qoondaha ee miisaaniyadda ee hayadaha keeni waaya xisaab-xirka billaha ah.

2. Maamul goboleedyada iyo Gobolka Banaadir waxaa laga doonaya in ay soo xisaab celiyaan isticmaalka lacagaha dowladda dhexe oga wareejisay Miisaaniyadda muddo saddex bilood ah bil gudaheed dhamaadka saddex biloodlaha;

3. Wasiirka wax lacag ah uma wareejin doono maamulka aan soo xisaab celin xisaabtii hore ee ku xusan faqrada 2^{aad} ee qodobkan;

4. Warbixinta Miisaaniyadda ayaa si bille iyo rubac sanadle ah lagu daabici doonaa website-ka Wasaaradda, xilliga kama danbeysta ah ee bilkasta lagu daabacayo warbixinta, wasiirka ayaa ku soo saari doona wareegto.

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

4 Cutubka 4^{aad} Qoondaynta Miisaaniyadda

4.1 Qodobka 22^{aad} Qoondaynta Miisaaniyadda Xafiisyada Dowladda

1. Miisaaniyadda hoos ku xusan waxaa loo qoondeeyay xafiisyada Dowladda sanad Miisaaniyadeedka 2023-ka, waana sida hoos ku xusan.

a) Miisaaniyadda Joogtada ah	US\$ 480,448,293
b) Miisaaniyadda Raasumaalka	<u>US\$ 496,768,246</u>
Wadarta Guud	<u>US 977,216,539</u>

2. Faah-faahinta qoondaha Miisaaniyadda waxay ku caddahay oo ay ku faah-faahsantahay xagga hoose ee xeerkan.

4.2 Muddada Dhaqan-galka

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa ay ansixiyaan Labaa Aqa lee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Laga soo saaray Muqdisho _____ malinta _____ 2022

Madaxwaynaha
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaali

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

5 Lifaayada Miisaaniyadda Sanadka 2023-ka

5.1 Soo Koobida Dakhliga iyo Kharashka Miisaaniyadda sanadka 2023

FAAH-FAAHIN	2021	2022	2023	Isbadalka	Isbadalka	Wadaagga %
	Dhabta	Saadaal	Kutalagalka	Tiro	%	
1. DAKHLIGA GUDAHA & DEEQAHA	376.5	556.4	950.7	394.3	70.9%	100.0%
(A) DAKHLIGA GUDAHA	229.6	248.1	283.3	35.2	14.2%	29.8%
Canshuuraha	162.8	168.1	189.9	21.8	13.0%	20.0%
Canshuurta Dakhliga & Faaidooyinka	15.2	15.2	18.0	2.8	18.7%	1.9%
Canshuurta Hantida	0.6	0.6	0.6	0.0	5.1%	0.1%
Canshuurta Adeegga & Agabka	23.4	24.5	33.1	8.6	35.2%	3.5%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	109.0	114.3	123.2	8.9	7.8%	13.0%
Canshuuraha Kale	14.6	13.6	14.9	1.4	10.2%	1.6%
Dakhliga aan Canshuuriga ahayn	66.8	79.9	93.4	13.5	16.8%	9.8%
(B) DEEQAHA DIBADDA	147.0	308.3	667.4	359.1	116.5%	70.2%
Taageeridda Miisaaniyadda	38.4	173.4	170.6	-2.9	-1.6%	17.9%
Mashaariicda Deeq bixiyaasha	108.6	134.9	496.8	361.9	268.4%	52.3%
2. KHARASHKA GUUD	474.0	549.8	977.2	427.4	77.7%	100.0%
Kharashaadka Joogtadda	369.0	403.5	480.4	76.9	19.1%	50.5%
Adeegga Shaqaalaha	248.1	247.4	281.7	34.4	13.9%	29.6%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	67.6	66.3	123.7	57.4	86.7%	13.0%
Mashaariic	2.9	3.1	15.9	12.7	409.7%	1.7%
Dheef-korka & Dhulsaarka Kale	14.6	0.9	5.8	4.9	569.2%	0.6%
Kaalmooyinka	-	0.0	-0	-0.0	-100.0%	0.0%
Deeqaha Dowladda Dhexe	35.7	85.9	50.9	-35.0	-40.8%	5.4%
Keydka Kabidda	-	-	2.5	2.5	0.0%	0.3%
Kharashaadka Mashaariicda	105.0	146.3	496.8	350.5	239.7%	52.3%
Adeegga Shaqaalaha	2.0	1.9	5.8	3.9	209.3%	0.6%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	38.5	40.1	102.8	62.7	156.4%	10.8%
Mashaariic	13.2	9.3	38.4	29.1	313.6%	4.0%
Kaalmooyinka	1.3	2.4	9.0	6.6	272.9%	0.9%
Deeqaha Dowladda Dhexe	10.1	19.5	139.6	120.1	614.8%	14.7%
Fa'idada Bulshadda	39.9	73.1	201.3	128.2	175.4%	21.2%
3. Faraqa	-97.4	6.6	-26.6	-33.1	-503.6%	
Bixinta Qaamaha Dibadda	14.0	12.3	14.2	1.9	15.3%	
4. Keydka (1)	-111.4	-5.7	-40.8	-35.0		
Lacagaha Haraaga ah 1st January 2023	66.1	42.7	51.8			

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

5.2 Faah-faahinta Dakhliga Guud Dowladda Ee Miisaaniyadda sanadka 2023-ka

FAAH-FAAHIN		2021 Dhabta	2022 Saadaal	2023 Kutalagalka
1	Dakhli	376,536,124	556,361,507	950,661,444
a	DAKHLIGA GUDAHA	229,561,405	248,058,196	283,306,139
11	Canshuuraha	162,766,994	168,119,485	189,908,340
111	Canshuurta dakhliga, macaashka iyo raasamaalka	15,209,581	15,158,912	17,987,877
1111	Canshuurta Mushaharka - Shaqaalaha	14,290,034	14,294,000	14,529,153
111111	Canshuurta Mushaharka - Shaqaalaha	6,529,153	6,700,000	6,529,153
111112	Canshuurt Mushaharka - Shaqaalaha Dowladda	7,760,881	7,594,000	8,000,000
1112	Canshuurt Mushaharka - Shaqaalaha Gaarka	919,548	864,912	3,458,724
111201	Canshuurta Faa'idada Shirkadaha	919,548	864,912	3,458,724
113	Canshuurta Hantida	579,865	610,000	640,947
113101	Dakhliga kirada	579,865	610,000	640,947
114	Canshuurta agabka iyo adeegga	23,429,410	24,518,297	33,144,399
114121	Huteelada	1,099,896	1,017,000	1,244,399
114122	Isgaarsiinta	3,689,162	2,464,009	6,600,000
114123	Shirkadaha Laydhka	2,549	-	2,000,000
114124	Badeecadaha dibadda laga keeno	17,664,767	18,000,000	19,055,000
114125	Tikidhada diyaaradaha	973,036	3,037,288	1,320,000
114126	Adeega TV-cables	-	-	2,750,000
114127	Canshuurta iibka - Mid kale	-	-	175,000
115	Canshuuraha ganacsiga caalamiga ah iyo wax kala iibsiga	108,974,991	114,272,276	123,185,890
115000	Canshuurta furdooyinka iyo alaabaha kale ee soo dagga	97,365,062	98,272,276	103,185,890
115199	Khaadka	11,609,929	16,000,000	20,000,000
116	Canshuuraadka kale	14,573,148	13,560,000	14,949,227
116111	Faranka boolada (notary)	3,543,275	2,434,000	2,677,448
116211	Canshuurta waddooyinka	1,504,973	1,212,000	1,333,492
116212	Faranka boolada kale	5,494,433	5,814,000	6,395,709
116214	Faranka boolada furdooyinka	4,030,466	4,100,000	4,542,578
13	Deeqaha	146,974,719	308,303,311	667,355,305
A	Deeq Laba Dhinac ah	38,352,690	173,445,619	170,587,059
131	Deeqaha dawladda shisheeye	2,500,000	37,100,000	30,000,000
131101	Deeqda Turkey	2,500,000	27,500,000	30,000,000
131128	Deeq UAE	-	9,600,000	-
132	Deeqaha hay'adaha caalamiga ah	35,852,690	136,345,619	140,587,059
132191	Bangiga Adduunka - RCRF - Taageerada miisaaniyadda	35,852,690	23,329,628	34,887,059
132192	Current – World Bank – Performance Based Fund	-	-	9,700,000
132193	Bangiga Aduunka - Development Policy Operation (DPO)	-	94,725,965	75,000,000
132194	Intergovernmental Authority on Development (IGAD) Support	-	-	-
132195	Midowga Yurub	-	18,290,027	21,000,000

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2023-KA

B		108,622,029	134,857,692	496,768,246
	World Bank (WB)	102,355,311	127,399,886	455,366,131
132102	Current - World Bank - Capacity Injection Project	1,925,134	788,457	-
132103	Current - World Bank - Public Financial management	3,980,813	2,599,481	-
132107	Current - World Bank - Recurrent Costs and Reform Financing Project	10,078,830	12,816,707	11,090,633
132108	Current - World Bank - Somalia Urban Resilience Project		17,559	-
132109	Current - World Bank - Somali Urban Investment Planning Project	1,065,468	-	-
132111	Current - World Bank - Somalia Urban Resilience Project PH2(PCU)	5,964,804	1,063,755	85,393,881
132112	Current - World Bank - SEAP	2,344,382	-	386,540
132113	Current - World Bank - SESRP		666,667	11,604,090
132114	Current - World Bank - SCALED-UP PROJECT	7,667,641	39,830,157	21,545,900
132115	Current - World Bank - "BIYOOLE" PROJECT	7,541,179	-	9,174,000
132116	Current - World Bank - Somalia Shock-Responsive Social Safety Net	7,153,207	5,349,433	120,384,200
132117	Current - World Bank - Somalia Crisis Recovery Project (SCR)	20,761,986	-	61,162,032
132118	Current - World Bank - Somali Integrated Statistics and Economic	2,045,766	7,534,399	5,749,290
132120	Current - World Bank - Damal Health Project	-	13,210,303	25,259,800
132121	Current - World Bank - Somali Education Human Capital Project	-	15,439,156	8,605,840
132122	Current - World Bank - Somali Horn of Africa Infrastructure Integrat	-	6,670,765	2,658,800
132123	Current - World Bank - Ground Water for Resilience Project (GW4)	-	-	6,724,900
132124	Current - World Bank - Somalia Emergency Locust Response Proje	31,826,101	21,413,047	5,268,000
132125	Current - World Bank - DE-RISKING, INCLUSION AND VALUE ENHAN	-	-	6,400,700
132126	Current - World Bank - SOMALIA COVID-19 EMERGENCY VACCINA	-	-	49,303,000
132127	Current - World Bank - SOMALIA EMPOWERING WOMEN THROUGH	-	-	3,334,526
132128	Current - World Bank - SOMALIA WATER FOR RURAL RESILIENCE PROJECT Biyoole 2			17,020,000
